


HOOVAANTA AFKA HOOYO



LES FRUITS MURS DE LA LANGUE MATERNELLE

Murti lama dhaafaan ah

Is afgarashadeena iyo maamuuska aduun weynuhu inoo leeyahay, waxay ku xidhan yihiin, qadarintaan u leenahay hiddaheena iyo dhaqankeena. Waa in, haddaba, aan la muquunin oo loo hawlgalaa, maadaama isagu yahay assaska horumarkaan rabno inaan gaadhno. Laaxinkana waxa ka rabi, nabadgeyadiisuna ku jirtaa, marka lagu qoro afafka dalkeenu hiddaha u leeyahay.

*Sareeyaha Mudan,
Madaxweyne
Al Xaaj Xassan Guuleed Abtidoon*

Djibouti, le 27 juin 1983

Notre compréhension mutuelle et le respect des autres nations à notre égard, reposent sur la considération que nous accordons à nos cultures et à nos traditions. Il ne faudra pas les perdre mais les consolider pour en faire les outils du développement que nous souhaitons atteindre. Leurs écritures dans nos langues nationales permettront de les préserver contre toute déperdition.

*Notre président,
Son Excellence
El Hadj Hassan Gouled Aptidon.*

Djibouti, le 27 juin 1983.

PREFACE TO «HOOBAANTA AFKA HOOYO»
BY SAID AHMED WARSAME

The task which Said Ahmed Warsame has undertaken in writing «Hoobaanta Afka Hooyo» (the ripened fruit of the mother tongue) is highly praiseworthy. By collecting the traditional poetry of the Somali pastoralists of the Djibouti Republic he has preserved it for the future generations of his co-citizens, and made it accessible to the world outside, since that which is published can readily be translated. In this connection the author must be commended for providing the text with lexical annotations which cover those archaic, obsolescent or highly specialized words which might not otherwise be fully comprehensible to younger people.

The poems are placed in their social and ecological setting in a way which adds to their value as documentation ; the book provides us, in fact, with far-reaching insights into the way of life and modes of thought of the society which produced this beautiful and interesting poetry.

It is to be hoped that this publication heralds further contributions to the study of the cultures of the Djibouti Republic, both by Said Ahmed Warsame himself and by others of his compatriots who might be inspired by the worthy example of «Hoobaanta Afka hooyo»

ISERST is to be congratulated on its initiative in publishing this book, which certainly deserves its support.

B.W. Andrzejewski,
professor of cushitic
languages and literatures
in the university of London.

PREFACE AU HOOBAANTA AFKA HOOYO
PAR SAÏD AHMED WARSAMA

La tâche entreprise par Saïd Ahmed Warsama en écrivant «Hoo-
baanta afka hooyo» (les fruits mûrs de la langue maternelle) est vrai-
ment digne d'éloge. En collectant la poésie traditionnelle des pasteurs
somalis de la République de Djibouti, il l'a préservée pour les généra-
tions futures de ses concitoyens et l'a rendue accessible au monde
extérieur, puisque ce qui a été écrit peut être à tout moment traduit. Il
convient de recommander à l'auteur de pourvoir le texte d'un lexique
d'annotations qui doivent couvrir tous les mots archaïques, désuets
ou hautement spécialisés lesquels, autrement, risqueraient de n'être
pas entièrement compris par les jeunes.

Les poèmes sont placés dans leur contexte social et écologique
d'une manière qui ajoute encore à leur valeur en tant que documents.
Le livre fournit en effet des vues étendues sur le mode de vie et de pen-
sée de la société qui a produit cette intéressante et belle poésie.

Il est à souhaiter que cette publication soit la première d'une série
consacrée à l'étude des cultures de la République de Djibouti, à la fois
par Saïd Ahmed Warsama lui-même ainsi que par d'autres com-
patriotes qui pourraient s'inspirer de ce digne exemple que constitue
«Hoobaanta afka hooyo».

Il faut féliciter l'ISERST de son initiative en publiant le livre qui méri-
tera certainement son appui.

B.W. Andrzejewski,
professeur de langues
et littératures couchitiques
à l'Université de Londres.

HORDHAC

Dhawrka bog ee hordhucu waa kuwa soo koobaaya wax ka taataab-
shada hadalka iyo hawraarta. Gaar ahaan maansada qofka waxa ka
keena.

Intaa waxa raaca sida reer baadiyaha ay ugu qaybsan yihiin xooluhu, la
hadalka dibida marka beeraha lagu qodaayo marka awrta la raraayo,
goorta xoolaha loo heeso, waxa xoolaha qaar caadaystaan, sida aan
loo garanayn cidda tirisay heesaha xoolaha intooda badan, sida la
iskugu tabiyo heesaha lo'da, kuwa geela iyo kuwa ay wadaagaan, ee
lagu sheego laba gardaaqa.

Anoo haddaba akhristaha ka siinaaya fikrad kooban arintaas, ayaan ku
bilaabayaa in af Soomaligu u gaybsamo hadal iyo hawraar. Waxaana
hore loo yidhi, «HADALLOOW NIMBA SI KUU YIDHI, HAWRAAREEY
NINBA SI KUU QAADAY».

Hadalku waa erayo aan yeelan karin luuq iyo jibtoona oo laga siman
yahay ku hadalkooda. Hawraartu se waxa ay kaga duwantahay
hadalka taxnaanta, jibta iyo luuqda in lagu manaystay mooyee
dadkuna kama wada sinna.

Wax allaale wixii la tiriyo ee yeelan kara dhacdo «rythem» qaafiyad iyo
miisaan ayaa la isku yidhaa maanso ; sida, gabayga, guurawga, gee-
raarka, guuxa, buraanburka, heesta iyo halaanhalka. Qaafiyaddu, waa
xarafka ay ku socoto maansadu, hanaanka ay u socotana waxa la
yidhaa miisaan. Qayb walba oo ka mid ah qaybaheedu waxa ay leeda-
hay hanaan u gaar ah, oo lagaga sooci karo kuwa kale. Waxaana
shaki ku jirin in dhacdada qayb kasta oo iyada ka mid ihi ka duwan
tahay ta kale. Maansada waxa abwaanka ka keena saddex arimood
midkood, waxayna kala yihin :

1. HIBO KEENTAY
2. HIBASHO KEENTAY
3. HAWLI KEENTAY

Ta hore isaga oo wax u tabanayaa jirin ayuu iska tiriya. Ta labaadna
markay dhibaato hayso, ama wax u tabanayaa jiraan ayuu ku gunuu-
nucaa oo u ku sheegaa waxa haya. Ta saddexaad oo ah hawli kentay,
wa tu shaqadu la timid si kastaba ha noqotee. Waana iyada ta
qoraalkani saamaynayaa, gaar ahaan kuwa xoolaha lagula hadlo.

Heestu waxa ay u gaybsantaa hees ciyaareed, hees hawleed iyo hees hawaawi. Ta danbe waa mid abwaanka kaga soo bixin si ula kac ah, lagana yaabo inuu ku heeso isaga oo wax hawla faraha ku hayn, qoob ka ciyaarkeedna joogin.

Sida la og yahay dadkeenu waxa ay ka mid yihiin ummadaha intooda badan lagu tiriyo xoolo dhaqatada, kuna nool oontooda. Waxayna arintaasi awood u siisay inay si fiican u afgartaan una dhuuxaan dhaqdhaqaaqa iyo nolosha xoolaha.

Xoolaha la dhaqdaa waxa ay u qaybsamaan marka dnaqankeenna loo eego shan meesi ; waana geela, lo'da iyo adhiga, waxaana la isku yidhaa nicmoolay. Dameeraha iyo fardahana gamaan baa la isku yidhaa. Sida halganka jiritaanku faray, waxay dadkeenu u jecel yihiin geela oo ah ka kaliya ee u qabatiimi kara nolosha adag. Waxaana filayaa in ummad kastaa siiso mudnaanta wixii nolosha adag, ama qalafsan ee ay ku nooshahay u adkaysan kara, iyageyna ka doorbi-daan kuwa kale ee ka faa'iido badan.

Geelu lo'da iyo adhiga lama tartami karo marka loo eego dhinaca faa'iidada, wuuna ka liita. Isagaa se ka magac dheer inta kale ee dadka qaar xurmeeyaan. Meesiga labaad waa lo'da, iyadaana ugu waxtar badan marka ay haysato biyo iyo baad. Meesiga saddexaad wa adhiga, isna inkastuu leeyahay caano iyo subag lalama simaadi karo lo'da.

Kuwa hees hawleedadan intooda badani la xidhiidhaan waa kuwa lagu sheego nicmoolayda, gaar ahaan lo'da iyo geela. Inta adhiga lagula hadlaa intay kooban tahay ayeynan lahayn murti sidaa u sii qoto dheer. Waxa kale oo jirta in reer baadiyah jamhuuriyadda Jibuuti u heesaan dameeraha. Kuwaas oo ah kuwa kaalin aan yarayn kaga jira halganka nolosha ay ugu jiraan. Waxa kala siman arintaas dadka degen degmada saylac, ta lughaya iyo ta Boorama oo ah degmooyin ka mid ah degmooyinka Jumhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomalia, iyo inta ay dhaqan wadaagaan ee degen Itobiya soona xigta Jumhuuriyada Jabuuti.

Lo'da waxa heesaha lagula hadlaa marka la waraabinaayo, marka car-rada darka loogu shubaayo, ama marka ilkaheeda ay ku goosanayso iyo marka dibida beeraha lagu qodaayo. Geelu labada hore wuu kala siman yahay, wuxuu se dheer yahay lo'da heesaha galabtii lagu hooyo.

Heesaha lo'da iyo geela lagula hadlaa waxa ay u qaybsamaan saddex qaybood oo kala ah :

1. Kuwa geela u gaara
2. Kuwa lo'da uun loo qoondeeyey iyo
3. Kuwa ka dhexeeya loona yaqaan laba gardaaq.

Saddexdu wey ka siman yihiin ku halgabsiga neef qudha, toos ula hadalka inta badan iyo dhinaca murtida. Sidaan u sharxayna haba yaraatee kama tagana ujeedooyinkii bilawgii laga lahaa, waxaa se laga heli karaa oo heesaha qaar leeyihiin ujeedooyin intaa ka durugsan kana qoto dheer. Waxayna la socon karaan waayaha maanta, ka bari dhaqanka u leeyahay iyo siyaasadiis. Taasina maaha tu abwaanadii tiriyeey ula danlahaayeen, waa se arin waayo aragnimadu curisay, salkana ku haysa murtida margiga ah.

Maansada xoolaha lagula hadlo waxa laga heli karaa murtiyo la siman kuwa dadka loo jeediyo una badan heeso. Haddii aan isweydiino ciddii tirisay hees hawleedada ku saabsan xoolaha, wey adag tahay sida loo sheego, in la magac dhabo iyo degmo ay yihiintoon.

Sobobtuna waxa ay tahay, marka xoolaha la waraabinaayo qof kasta oo hawsha waraabka ku jiraa, ama ku eedaniba wuxuu isku maawee-liyaa oo u isku dhaafshaa dhibaataada heeso u kula hadalaayo xoolaha. Waxayna iska daba ridaan luuqda, erayada iyo jibtooda, ma se shu'aaystaan danina kama hayn ka tiriyeey iyo degmo u yahay toona. Intaa waxa raaca in heesuhu soo taxnaayeen muddo dheer oon la soo kobi karin.

Arinta waxa kala siman reer magaalaha. Waxaana tusmo u ah, wakhtigan iminka oo la habeeyo barnaamajyada ka baxa raadiyaha iyo telefishanka, lana sheego ka tiriyeey heesaha iyo ka ku luuqeeyaba, ayaa waxa dhacda in dadka dhageysta iyo kuwa qayba heesuhu aynan oqoon ka midhaha alufay. Ka ku luuqeeya se intooda badani haddii la weydiyo wey sheegaan kuu yahay.

Isku tabintoodana waxa kaalin weyn kaga jira hayaanka iyo kolba meel naq iyo biyo leh raadinta. Taasina waxa ay la timaad in kooxiba meeshii ay ku noolayd ka tegto una gudubto meelo kale. Waxa had-daba dhici karta in reero kale kula kulmaan meelahay u doobteen kuwaas oo laga yaabo in iyana ka kala yimaadeen arlo kale oo ka fog halkii lagu kulmay.

Reeruhu wey kala degaan oo inta aan isgaranaynin iskuma soo dha-waadaan. Waxay se ku kulmaan meelaha danta waraabku ugu jirto, oo ah kuwa kaliya ee si dadaba la iskugu dhaafsado heesaha ku fida degmooyinka ay degen yihiin reer guuraaga soomaliyeed.

Xooluhu sida dadka ayey magacyo kala leeyihiin. Ishinka marka la maalaayo intoo neef walba magaciisa loogu yeedho ayaa ilmihiisana loo soo bixiyaa. Wuxuuna ka dhex ciyaa boqlaal neef oo kale halkii laga yeedhaayeyna wuu tagaa. Imaatinkiisana waxa u sobob ah magaciisa u maqlay iyo kalgacalkuu u qabo ilmihiisa.

Lo'da iyo geela waxa u dhalana inuu nef horkaco marka ay socod maagaan. Waxaad ka soo qaadaa, adoo shalay u soofiyey bari, oo maantana la maagan galbeed, ayuu marka ay xerada ka dareeraan ula kacaa horkace halkii shalay, iyana wey dabagalaan. Haddaad rabtid inaad ka duwdid halkay foodda sareen, waxaad iskugu daraysaa ka hor socda dirir iyo magaciisa. Isna ma meerdeeyee judhiiba wuu ka leexdaa halkuu rabay, oo halkaad la dooneysey buu ula leexdaa xaynta daba joogta.

Reer baadiyaha kuwooda xoolaha jira maalin oo idil waa u rafaad. Sidey barqadii uga baxaan beesha waxay ku soo noqdaan gabaldhac, iyaga oo laga yaabo inay biyo iyo baadtoona jidiinkooda marin.

Waxaana dhici karta inay xoolaha meelo fog u arooriyaan. Kuwaas oo noqon kara kuwa aan lahayn astaamo kala gedisan oo wax lagu tilmaansado. Haddaba hadduu dayoobo ka lo'da ama geela wataa oo u garanwaayo dhinicii beeshu ka xigtay, fooddana u saaro arla kale, kama yeelaan oo waxa ay ula baydhaan dhinaca toosan.

Heesaha ka sokow waxa jira tabo iyo ereyo lagula dhaqmo dibida iyo awrta oo iyagu ah kuwa lagu qabaanto kaalin weyna kaga jira nolosha qodaalka iyo ta reer guuraaga.

Beeralaydu dibida si joogto ah ayey ula hadlaan. Xaraashka iyo layligana waxa si fiican u afgaran og xarashka, oo ah ka qabatiima hawlaha lagu fulinaayo, una hogaansan ka ku tarkifalaaya. Layliguna waa ka aan jaraqbadka ahayn, dalagana sida la rabo uga soo bixin, ka tababaraayana ku haya dhibaato. Layliskana wuxuu ku jiraa ilaa u ka qabatiimaayo hawlaha hayna u noqonaayo.

Tabaha tababarka waxa ka mid ah sandulaynta, waana marka tiirka labada dul kala qaybiya, dadka qaarra u yaqaaniin loodloodada laga dalooliyo laguna xidho fuunyo. Marka sida la rabo u yeeli waayo ayaa la jiidaa xadhiga. Sidaa waxa loo yeelaa, si uu u xanuunsado una ogo-laado amarka sanduleeyaha. Geeluna arintaa wuu la qabaa oo wa la faruur xidhaa.

Dibida marka beeraha lagu qodaayo, meelaha sagaalka aroornimo ayaa alaabta lagu meeraraa, waxaana laga furaa shanta galabnimo ama goor ka horaysa cedceed dhaca. Dalaga meel baa laga bilaabaa, isla halkaana waa laga soo celiyaa. Haddii ay istaagaan dibidu inteynan marshadu faagga la gudboonaan waxa lagu yidhaa dug yar, oo ah talaaba kaliya hore u qaad. Intii la rabay intay horay u qaadaan ayey istaagaan. Haddii marashadu faagga hoos uga dhacdo oo halkuu marilahaa shubadku yar seego waxa la yidhaa tacay, oo ah sare u bax. Kor markuu uga baxana waxa la yidhaa lacay, oo ah hoos u deg.

Marka ay hawshu bilaabanto ilaa laga gaadhaayo labada galabnimo si fudud ayey u hawl galaan, mar haddii ay daalaan se hees la'aan ma nuuxsadaan. Isla luuqda macaan ee heesuhu markay u baxdo ayey dhagaha kor u taagaan oo waxaaba la moodaa dooni bad mus-haaxaysa.

Geeluna kama liito lo'da, oo erayo u gaar ah sida la rabana wax lagu garansiiyo ayey leeyihiin. Kolka awrta la raraayo ee la rabo in caymarka lagu xidho iyaga oo tu'san baa lagu yidhaa samayso. Intuu is ururiyo ayuu sabarkiisa sare u qaadaa. Sidaana wuxuu u yeela si ay ugu suurawdo ka raraaya inuu si fudud oo habsan u raro.

Haddii la rabo in la joojiyo doo baa la yidhaa, tu'na, waa fadhiso, hoohna, waa dhaqaaq, tirona, waa lugta kor u qaad oo hogaanka aad ku joogtid siidaa, dibdisna, waa aan ku dabree labada qoob isasaar. Daydayona, waxa lagu yidhaa marka u maraayo meel dhaadhaca oo looga baqaayo inuu ku siblado, isna markuu maqlo ereyga cagta wuxuu dhigaa mesha ku haboon. Intaan soo sheegay intay ku amar qaataan ayey yeelaan sida la rabo.

Waxaan jeclahay inaan akhristayaasha sharafka leh u sheego iney dulucda ka danbaysa ururinta heesuhu tahay mid ah dabaqabataynta murtida lagula hadlo xoolaha oo ku dhaw nabaadguur. Waxaana u sobob ah, reer baadiyaha oo marba marka ka danbeya sii reer magaalobaya. Taana waxa keentay abaaraha isdaba joogga ah, dagaalada ka socda Geeska Afrika, baahida oo badatay, iyo dadkii u joogay magaaloooyinka oooy tabartii dhaqaaluhu u awoodi weyday iney wax hagartira u diraan kuwooda kaga eeddin baadiyaha.

Ma odhan karro heesahana waa laga tegey oo waxa lagu doorsaday kuwa magaalada ee habka iyo hannaanka cusub la yimid. Hase yeeshee nabaad guurkoodu wuxuu ku sugan yahay, ilawga kuwii hore, iyo ku dhaqanka kuwa aan xoolaha loogu heesin oo hab cusub ah.

Waxa kale oo jirta kuna sheegi karaa nassiib darro, dadka yaryar oo haba yaraatee la socon dhaqankoodu murtida u leeyahay. Waxayna moodaan inuusan cilmi ku dhisnayn, lagana murti roon yahay. Kuwaana waxaan rabaa inaan u huro hoobaanta afka hooyo u leeyahay, macaankeedana aan dhadhansiyo. Waxaan intaa raacinayaa in tixaha qaarkood, gaar ahaan kuwa tirsigoodu yahay 3, 4, 15, 48, 54, 64, iyo 71 ay leeyihiin kuw ay isku micno yihiin, hase yeeshee odhaahdoodu kala gedisan tahay. Kuwaasi waxay ku qoran yihiin bogga 119 naad. Waxayna wataan isla tirooyinka tixaha ay isku ujeedada yihiin.

Waxa kale oon akhristaha u sheegayaa in erayadaan filaayey iney sharax u baahan yihiin aan sharxay. Iyana waxay ku qoran yihiin bogga 120 naad iyo ka 123 naad. Waxayna wataan isla tixaha ay ka soo jeedaan tirsigooda.

Ururinta heesaha xoolaha loo qoondeeyey dad badan baa taageero iyo dhiirin deeq nooga dhigey, inna weyba ku gacmo seydheen, in loo ooman yahayna dareen guud ayaa u ahaa astaan. Anana baaqa dahsoon ma diidine, maahmaaho iyo gabay, geerar iyo buraanbur, halxidhaale iyo hees, xidigo iyo faal, xeerka aan lee nahay, halkii geediga laga wadi lahaa, aasaaska dhismaha ama ambaqaadka hawsha, ayaan u gogol dhignoo u xaadhnay dhabada.. Adna akhirstaw waxaan kaa codsanaynaa inaanad nagaga masuugin fikradaad ka qabtid murtida isirkeen u qoondeeyey inuu isku dhaafsho halgen hawleedkuu ugu jirey daryeelka duunyada.

Waxa lama gaasiraan ah ooy runtu tahay, in abwaanada iyo waayoaragyada la'aantood tamartayo aynan meel marteen. Haddaba, kii xaraf noo shegey iyo kii na tilmaamayba dhamaantood ha naga guddoomaan mahad.

-Waxaan se si gaar ah mahad ugu guntayaa intii hawsha culeyskeedu ku dhacdey ee mar kastaba heeganka noo ahayd. Kuwaana waxaan ku soo koobayaa oon mudnaanta siinaynaa XASAN CILMI iyo AHMED ADEN oo sharaxa iyo ururinta heesaha si gaar ah nooga taageerey.

Waxa isna lama illawaan ah, oo mahad aan la soo koobi karin mutaysatay Prof. B. W. Andrezjeweski oo ku xeel dheer afafka kushatiga iyo suugaanta, Suugaanta Soomaalidana si fiican u yaqaan. Brofisarku wuxuu jeclaystay ururinta heesaha xoolaha loo tiriyo, wuxuuna isku hawlay inuu akhriyo hoobaanta iyo tarjumadeedaba. Isagaana u sameeyey gogoldhigga ku qoran bogga labaad ee hoobaanta.

Waxa kale oo jirtey in mar aan muqdisho u tegey hawl la xidhiidhdha hiddaha iyo dhaqanka, aan akadimiyaha kula kulmay YAASIIN CUSMAAN KEENADIID, qoraha qaamuuska af soomaaliga, MAXAMED WARSAME HADRAAWI, iyo dad badan oo oqoon u leh heesaha xoolaha, iyana tixo heeso ah ayaan tusay oon kala sheekaystay, sidaana waxaan u yeelay si aan u ogaado in heesaha si loo wada yaqaan iyo in kale. Waxaana muuqatay in intii markaa aan siday een isla eegnay ay noqdeen kuwa la wada yaqaan, kala gedisnaani hadday jirtana ay ku jirto meerisyada qaarkood. YASIIN iyo Hadraawi mahadi ha iga gaadhee tabtaan u waday hawsha ayey tabo iigu dareen.

Dhibaato la sheegaa ma jirin oon ahayn dhinaca dhaqaalaha. Taa saana la timid inaan la hoos galno madaxda degmooyinka danhawleedkaan u soconnay. Waxaana si wanaagsan nooga taageeray noona fududeeyey hawlahaan lahayn, una mahad naqayaa gudoomiyihii Calisabiix, mudane Saalax Cumar iyo gudoomiyihii degmada Dikhil mudane Cusmaan Rooble Dacash.

AVANT-PROPOS

Ces quelques pages d'introduction sont destinées à situer les «chansons du travail» dans la littérature orale et le contexte socio-culturel somalis.

Qu'est-ce que la poésie et qu'est-ce qui inspire le poète ?

Quels sont les animaux préférés des nomades somalis ?

En quelles occasions parlent-ils aux animaux ou chantent-ils pour eux ?

Comment ces chansons se sont-elles transmises d'un campement à l'autre, d'une génération à l'autre ?

Nous allons tenter de répondre à ces quelques questions.

«Parole, chacun t'exprime à sa manière !

Récit, chacun t'interprète à sa manière !

Ce dicton distingue deux façons de parler pour s'exprimer en langue somalie. La parole, langue de tous les jours est composée de phrases construites le plus simplement possible pour qu'elles puissent permettre de s'exprimer le plus clairement possible.

Le récit par contre est savamment construit, il peut être chanté et donne lieu souvent à différentes interprétations. Il peut posséder un rythme, une mesure et des rimes, le récit devient alors un poème.

Il existe plusieurs genres poétiques dans la littérature orale somalie : Gabay, Geerar, Guux, Guuraw, Hees, Halaanhal, Heelo, Buraanbur, possédant chacun ses propres caractéristiques en composition, rythme, musique...

Les Somalis classent les poèmes selon l'état d'esprit et l'inspiration du poète, ils distinguent :

1. La poésie innée de l'auteur naturellement doué

2. La poésie créée à l'occasion de peines morales

3. La poésie inspirée par le travail.

Il existe de même trois catégories dans le chant : les chansons du travail, les chansons de la danse et les chansons du rêve. Parmi les chansons du travail ce recueil concerne particulièrement celles destinées aux animaux domestiques.

Comme vous le savez, la majeure partie de notre peuple est constituée de pasteurs nomades dont le mode de vie est étroitement lié aux bêtes. Ces nomades ont acquis une connaissance parfaite de leurs animaux. Ils divisent traditionnellement leurs bêtes en cinq groupes. Trois groupes d'animaux sont productifs : les chameaux, les vaches, les moutons et chèvres (ces deux derniers constituent pour eux un même groupe) ; les deux autres sont les animaux de somme : les ânes et les chevaux.

Les chameaux qui sont pourtant les moins productifs sont les ani-

maux préférés de notre peuple. Ils ont acquis leurs titres de noblesse grâce à leur excellente adaptation au milieu désertique.

Les vaches arrivent en deuxième position, ce sont les plus généreuses en produits laitiers mais en même temps les plus exigeantes en eau et en pâturages. En troisième position se trouvent les moutons et les chèvres qui produisent aussi du lait et du beurre mais en moindre quantité que les vaches.

La plupart des chansons du travail s'adressent à ces trois catégories d'animaux productifs et parmi eux surtout aux vaches et aux chameaux. Celles concernant les moutons et les chèvres sont peu nombreuses et peu intéressantes.

Les nomades en République de Djibouti chantent aussi pour les ânes qui jouent un rôle non négligeable dans leur lutte pour la vie.

Le berger chante pour ses vaches et ses chameaux lorsqu'ils s'abreuvent et lorsqu'ils mangent de la terre salée. Il chante spécialement pour les chameaux pendant le retour au campement le soir. Les chansons concernant les vaches et les chameaux sont de trois sortes :

1. Celles destinées aux chameaux
2. Celles destinées aux vaches
3. Celles pouvant s'adresser aussi bien aux vaches qu'aux chameaux et appelées «Laba Gardaaq».

Elles peuvent s'adresser à un seul animal et à travers lui à tout le troupeau ou directement au troupeau en général.

Dans nos commentaires, nous nous sommes limité, pour chaque chanson, à expliciter son sens premier. Le lecteur s'apercevra certainement que certaines d'entre elles sont particulièrement riches de significations et peuvent illustrer des situations diverses de la vie ancienne et moderne. Il découvrira alors que cette poésie qui est destinée aux animaux n'a rien à envier sur ce plan là à celle destinée aux hommes.

Nous nous sommes posé en vain la question de savoir qui a composé ces chansons. Il est même difficile pour la plupart d'entre-elles de situer une région d'origine.

Leur circulation a été favorisée par cette perpétuelle recherche de pâturage et d'eau qu'est la transhumance. Les pasteurs, venus de contrées lointaines, qui se rencontrent aux points d'eau créent et échangent ces chansons sans y attacher de nom d'auteur.

Même aujourd'hui, les auditeurs de la radio retiennent facilement les noms des interprètes des chansons à la mode qu'ils fredonnent mais sont souvent incapables de vous dire les noms de leurs auteurs.

En plus des chansons, les nomades sont amenés, à plusieurs occasions de leur vie commune, à parler simplement et directement à leurs

animaux. Ils leur donnent, dès la naissance, un nom comme ils le font pour leurs enfants.

Pour traire les femelles on appelle chacune par son nom, puis on lui montre son petit. La bête est ainsi guidée d'une part par son nom et d'autre part par son instinct maternel.

Les chameaux et les vaches lorsqu'ils se déplacent sont habituellement guidés par un animal. Lorsque le berger les mène à un nouveau pâturage et qu'il veut les dévier de leur trajet habituel, il lui suffit, d'un ton sévère, d'appeler l'animal guide par son nom pour le faire changer de direction. Il obéira aussitôt et ira dans la direction indiquée par le berger, suivi par le reste du troupeau.

Le berger nomade supporte la faim et la soif toute la journée. Sorti le matin, il ne rentre au campement qu'au coucher du soleil souvent sans avoir ni bu ni mangé. Il emmène parfois son troupeau à un point d'eau situé dans des lieux éloignés et difficilement repérables. Dans de telles conditions il lui arrive de se tromper de direction pour rentrer au campement. Ce sont alors ses chameaux ou ses vaches qui retrouvent la bonne route et refusent de se laisser dévier.

Les agriculteurs des plateaux ont aussi un langage spécial pour faire travailler les bœufs dans les champs. Ils dressent les bœufs pour qu'ils puissent non seulement apprendre les travaux des champs mais pour qu'ils comprennent et obéissent à la langue de leur maître. Le dressage du novice durera tant que ces deux buts ne sont pas atteints.

Une des méthodes de dressage consiste à percer la cloison nasale du bœuf pour y accrocher une ficelle. Le dresseur tire sur cette ficelle et l'animal qui a mal obéit.

On utilise une méthode similaire pour le chameau, en attachant la ficelle à sa lèvre supérieure. Au moment du labourage c'est vers neuf heures du matin que les bœufs sont attelés. Ils le resteront jusqu'à cinq heures du soir.

Chaque fois qu'ils arrivent au bout d'un sillon, les bœufs doivent faire demi-tour et creuser un nouveau sillon. S'ils s'arrêtent avant que le soc ne soit au niveau du sillon précédent on leur dit «Dug Yar» c'est-à-dire «avance d'un pas». L'attelage fait alors un pas en avant puis s'arrête. Selon que le nouveau sillon dévie vers le précédent ou s'en éloigne trop, il faut leur dire «Lacay» ou «Tacay», les animaux obéissent rapidement et rectifient le tracé. Les bœufs travaillent sans arrêt jusqu'à vers deux heures de l'après-midi, ensuite ils se fatiguent et il arrive qu'ils ne puissent plus bouger sans entendre leur maître chanter. Dès qu'ils entendent sa douce chanson, ils dressent les oreilles et ils donnent l'impression de glisser sur terre aussi facilement qu'un bateau sur la mer.

Les nomades chargent le chameau quand il est assis, son ventre touche alors la terre. Pour pouvoir passer la corde sous son ventre on lui dit «Samayso» : il soulève légèrement sa poitrine pour laisser passer la corde.

Si l'on veut arrêter le chameau en marche il faut lui dire : «Doo» ; pour le faire asseoir : «Tu» ; pour le faire avancer «Hoo». «Dibdis» signifie «croise les pattes avant» (pour que son maître les attache). On lui dit «Daydayo» pour le faire ralentir et attirer son attention sur un chemin en pente où il risque de glisser.

Les chameaux obéissent à tous ces mots sans se tromper.

Pour conclure, je voudrais dire aux lecteurs que mon objectif est de rassembler ces chansons avant leur disparition dans l'exode rural, aggravé par le rythme accru des sécheresses, qui transforme de plus en plus de nomades en citadins. La civilisation qui touche progressivement les nomades dans leur vie quotidienne, leur fait découvrir ses nouveaux produits. En créant de nouveaux besoins, elle les rend plus vulnérables aux mauvaises saisons malgré l'aide matérielle de plus en plus importante qui leur vient des villes.

Il était donc urgent de sauver ces chansons de l'oubli et de les transmettre par écrit aux jeunes d'aujourd'hui et aux générations futures. J'espère qu'ils sauront apprendre et apprécier toute la sagesse contenue dans ces chansons qui constituent une des richesses de leur langue maternelle.

J'ai voulu aussi ouvrir la voie et préparer le terrain aux futurs travaux sur les proverbes, les poèmes en tous genres, les chants, les sciences occultes, les lois coutumières...

Je voudrais enfin exprimer mes remerciements aux nombreuses personnes qui m'ont aidé et encouragé dans mon travail. En premier lieu, je citerai Hassan Elmi et Ahmed Aden qui m'ont apporté une aide précieuse et qui n'ont ménagé aucun effort pour rassembler ces chansons et les commenter.

Je n'oublierai pas non plus le professeur B.W. Andrzejewski, expert en langues et littératures couchitiques et plus particulièrement en littérature somalie. Il a apprécié ce recueil de chansons destinées aux animaux qu'il s'est donné la peine de lire complètement. Il a ensuite bien voulu rédiger la préface.

J'ai aussi rencontré à l'Académie de Mogadisho, lors d'un séjour de travail sur les cultures et les coutumes traditionnelles, Yassin Osman Kenadid, auteur du dictionnaire somali, Mohamed Warsama dit «Hdrawi» ainsi que d'autres chercheurs qui avaient étudié les chansons adressées aux animaux. Nous avons pu faire des comparaisons entre les chansons qui font l'objet de ce recueil et celles qu'ils connaissaient. Nous avons pu ainsi constater qu'elles étaient souvent identiques à

quelques variantes près. Je remercie Yassin et Hadrawi pour leurs conseils et leurs encouragements.

Je remercie enfin les commissaires des districts, en particulier Salah Omar Heldid et Osman Robleh Dacash qui étaient en poste à Ali-Sabieh et Dikhil pendant mes recherches. Ils m'ont facilité énormément les contacts avec les nomades de ces régions. Sans leur aide, mon budget limité m'aurait empêché de mener mes recherches jusqu'au bout.





1 KAYD LULA

NAAGTA KAYD LULA
EE RAGGA U KULUL
KALDAMBEED IYO
KALIIL HA U DHALIN

Ninka reer miyiga ihi marka u socdaalaayo, wuxuu ooridiisa iyo inta ay iskaashadaan u sheegi jiray, inta bari ee u maqnaandoono, reerkana wuxuu ku sii balammin jiray kuwa u bidaayo xilkasnimada.

Marka soo noqodkiisu soo dhawaado ayey haweenaydu kayd sii dhigi jirtay. Kaydkuna wuxuu noqon jiray, inta badan caano, gaarahaan kuwa lo'da. iyagana afar iyo labaatan saacadood kaydhoodu ma dhaafo. Mar haddii ay gadhodhanna weelka waa laga madhiyaa, oo kuwa lis ah ayaa baddalkooda lagu shubaa.

Naagta wax garadka ihi kuwii gadhoodhay waxay siin jirtay ama se ay siisaa ninkii lagaga tegey. Ta lexejclada badani se wey lulataa. Waxaana lagu sheegi karaa qof u quudhi waayey ama se lexejeclo ka indhosaabtay kay dumaddiisa saaraayeen.

Haddaba ninka sacan la hadlaayey wuxuu u jeeday, in sac u dhalin naagtii kii lagaga tegey u quudhi weydey kaydii. Wuxuuna si gaar ah saca ugu goobaabiyey in guga dabayaaqadiisa u dhalo, oo uunan bilawgiisa iyo kaliisha toona u dhalin. Si neefka u sac ku lamaan yahay u helin daaq u kaga kaaftoomo naaska hooyadiis, uguna baahdo caanaheeda.

Haddii sidaasi dhacdo waxay kayd lula arintaasi u horseedi caano yari, una suurtoobi meysa iney subag badan dhigato. Waxa dhici jirtay, in reer baadiyuhu kolkuu gu'gu u dhamaado ay isweydiin jireen inta sac ee u irmaan hebel, iyo intay subag dhigtay marwadiisu.

Naagba naagta ay ka subag dhig badnayd, ayey ka sharaf badnayd. Tii subag dhig yarina weyba ugu liidatay. Waxaan odhan kara sobobtuu sidaa u yidhi, tix tiriyuhu waxay ahayd sharaf uu u diidaayey kayd lula. Wuxuuna noqon kara inuu ahaa kii lagaga tegey reerka ee ay qabsatay arintu.

*POUR LA FEMME QUI BAT LE LAIT RESERVE
A SON MARI ABSENT
ET QUI EST SEVERE POUR LES HOMMES
NE METS PAS BAS
A LA BONNE SAISON*

Avant de partir en voyage, le nomade dit à sa femme et aux hommes qui restent au campement, la durée probable de son absence. Lorsque son retour approche, sa femme lui réserve chaque matin une part de lait. Or, surtout celui de la vache caille rapidement et ne peut attendre plus d'une journée.

Dans la chanson, la femme au lieu de donner le lait caillé aux hommes restés au campement et chargés de la protéger, le bat pour en faire du beurre.

Le chanteur est un homme qui se sentant frustré de ce lait, s'adresse au troupeau de la femme.

NDT (note du traducteur) :

KALDAMBEED et KALIL traduits ici par «BONNES SAISONS» sont des courtes périodes chaudes qui annoncent et précèdent les pluies de mars.

Lorsque les vaches mettent bas à cette saison, elles sont assurées de trouver de l'herbe et de l'eau pour leurs petits.

Ces derniers seront assez grands pour affronter et survivre à la saison sèche de l'été.

SADUUF LADU BAWAY
BACH DICHYPOU
DICHOWZA WAA
DUP DATEDMO AN
DICHOWA CANNOWAN
LADUOF BACHAZA-DE





2 BICIID

SADDEX LAGU BARAY
 BAADI DOONYOO
 BICIIDKUBA WAA
 BUR DAREEMO AH
 BOONJIDA CARRADA AH
 LAASKA BADHAXA AH

Naflaydu iyada oo nolol wanaagsan wada jecel, ayey lo'duna kaba sii xagjirtaa. Waxayna jeceshahay, ama had iyo jeer doonta inay bar-waaqo hesho, inay biyo cabto maalin walba, carrana inay leefto.

Si kastaba ha noqotee saddexda meel lagama wada heli karo. Waxaa se dhici karta haddii la dadaalo in la isku keeni karo intaba. Waana marka, carrada loo soo guro, ee la dejiyo, meel biyo leh, daaquna ka dhaw yahay, ama daaq leh biyuhuna aynan.ka fogeyn.

Biciidka oo ugaadha ugu dadaal badani wuu isku waayey inuu meel ka wada helo saddexda heestu xustay, dulucduna waa dadaal la'aan, wax lama taransado.

ON T'A HABITUEE A CES TROIS LA
 ET MEME LA BICHE EN CHERCHANT
 N'A PU LES TROUVER
 UNE TOUFFE DE HAUTES HERBES
 UNE TERRE MEUBLE ET SALEE
 UNE SOURCE DELICIEUSE

Le chanteur énumère les trois éléments indispensables à la vache mais qu'on ne trouve jamais rassemblés au même endroit. Le travail du berger consiste à conduire le troupeau au meilleur pâturage sans trop s'éloigner des points d'eau et à leur apporter régulièrement à dos de chameau, souvent de très loin, de la terre salée.



3 JIILAL

MARKII FIDHINADA
 FARTA BIDIX IYO
 FOODDA LAGU SIDAY
 FIDHMAW JIILAAL
 GEDDAA INUU FALI
 SOO MA FILANAYN

Dhalinyaradu marka ay sindheerta yihiin, ama se baaluqa aad, ayey u xarago badan yihiin. Kibirkoodana looma adkaysan karo, oo waaba dheeraad. Kaalinta ceelkana iskama xajiyaan, ilaa ay muruqyadoodu adkaadaan. Barwaaqaduna wey u been sheegtaa, oo mudadaas yar fadhocintooda looma adkaysan karo. Adeegga loo dirana sida la rabo uma oofiyaan. Maanta iyo barina iney masoobi karin kama dhaadhacsana, kayd dhigashadeedna kama fikiraan. Wakhtiga ay heestu soo ifbaxday wuxuu ahaa jiilaal cadaadi naflaydu dhibsatay. Fidhin lihiina waxa ku soo baxsatay hawshii, urquun darena wey u raacday. Heestuna waxa ay tix tiriyaha ku soo dhacday markuu milicsaday fidhin lihii oo gorafkii la baxaa degaaya. Inkastu ula jeeday fidhin laha haddana dulucdu kama taggana kuwa la midka ah, een wax tashiilan.

LORSQU'ILS PORTAIENT LES PEIGNES
 A LA MAIN GAUCHE
 OU DANS LES CHEVEUX
 JE SAVAIS
 QUE LA SAISON SECHE
 ALLAIT SEMER LA DESOLATION

Le chanteur prend le troupeau à témoin pour souligner l'inexpérience des jeunes face à la vie dure de la brousse. Pendant la bonne saison ces jeunes, une fois repus avec le lait abondant, ne pensent qu'à leurs toilettes et oublient d'effectuer les travaux nécessaires à la préparation de la mauvaise saison.

La saison sèche est arrivée et voilà leur joie transformée en tristesse.




4 GAR IYO DHIXIDH

HABEENKAAN GUDO
EEN GEYAAN HELO
EEN GAR IYO DHIXIDH
MEEL ISGARAB DHIGO
GARAAD BADANUHU
WEY IGA GARAN JIRAY

Raggii hore xoog iyo xugunba wey kaydin jireen. Aadna wey iskaga ururin jireen wixii ay u arkaan inuu labada ama midkood wax ka ridaayo. Tixdan kii tiriyay oo iska waramay, wuxuu dareemay in shu-baashii iyo dardartii uu isku yiqiin ay kala dhantaalan tahay. Markuu arkay lo'dii oo dar ku meehanaw ku jirtana wuu eersaday galmadii habenkaas.

LA NUIT OU JE SORS
SI JE TROUVE UNE FILLE
SI JE LUI OTE
SON PAGNE ET SA CEINTURE
ELLES LE SAURONT

Au lendemain d'une nuit d'amour, le chanteur n'a plus assez de force pour tirer l'eau du puits.
Il ressent les beuglements d'impatience de ses vaches comme autant de reproches.



5 HORDHAC

HOOGA MAALYAW
YAA HORDHACA BARAY
UU ISKU HALAYN

Tixdani waa tu wax ka sheegaysa sac ku karti darraa u lahaa, oo ugu danbayn jiray, lo'da dabadeedna fuli jiray. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu kuwii kale uga soo horeeyey darka. Ka tixda tiriyey oo oqoon u lahaa kartilaawahana, goob joog buu ahaa. Allaa yaab u keenay kolkuu arkay kiiyo isa soo maqiiqaaya. Waana kolkaa kolkuu ujeediyey su'aasha odhanaysa, kaagan ka liitaa maalaa ma wax baa isbedalay, waa adigan darka isku soo tuurayee, mise cid aan kii ahayn baa kuu joogta meesha ood isku halayn.

TOI QUI APPARTIENT A UN FAINEANT !
SUR QUI COMPTES-TU
POUR BOIRE LA PREMIERE ?

Il s'agit d'une vache appartenant à un fainéant et qui avait l'habitude de boire les restes des autres troupeaux, son maître n'étant pas là pour lui tirer l'eau du puits. Un jour que la soif lui a fait oublier d'attendre, le chanteur le lui rappelle brutalement.

6 HABAW

YAAD HABAABINE
HEESTA WIILKIYO
HAWGA SOO RAAC
OO HA KALA HADHIN


Waxa loola jeedaa lo' soo aroortay, oo wali iman ceelka. Waana waano odhanaysa, lo' yahay si aydaan uga habaabin meesha ceelku yahay, tixgali oo soo raac, heesta wiilka ceelka kugu sugaaya.

Si kale haddii loo eegana, ninkastaa hawsha u hayo, sida haboon ee u ku fulin karaa waxay tahay, inuu ku dadaalo tixgalinta, tabihii hortii jiray, kuna saabsanaa hawsha u hayo oo kale.

Lama huraan waxa ah, inuu raaco xeeldheerayaasha taladooda, arri-mahaas oo isbiirsaday ayaa hubaal ah inay u horseedi, oo u ku gaadhi danaha u ka leeyahay iyo himiladiisa, cilmina ku dhisi.

*POUR NE PAS VOUS PERDRE
SUIVEZ LA CHANSON DU BERGER
ET LA RUMEUR VENANT DU PUIITS
SANS VOUS DISPERSER*

La chanson est destinée à des vaches sur le chemin menant au puits. On peut tirer de cette chanson la pensée suivante : pour réussir une entreprise, il faut rester unis et tenir compte de l'expérience et des conseils d'un sage.



7 DAYR

DAYR DHALKAAGIYO
DAYR NIN GUURSADAY
DAGAAGILANYOO
DAANKU DHEERAA

Dayrtu waa xilli gu dhamaaday, jiilaalna afka soo kala hayo, lo'da neefka xilligaa dhala iyo ragga kii guursadaaba wey jilcaan, rafaadna wey mutaan.

Tixduna waxa ay ka digeysaa, in raggu guurka iska illaliyo dayrta, lo'duna aynan dhalin, si aynan u dihaalin. Labaduba waxa ay ku farsan yihiin marka barwaqddu arlada maashayso.

QUAND TU METS BAS EN AUTOMNE
TU T'AFFAIBLIS
ET TU AS MAUVAISE MINE
COMME UN HOMME QUI SE MARIE EN
AUTOMNE

La vache qui met bas ou l'homme qui se marie en cette saison ne peuvent pas récupérer leurs forces car la nourriture est rare.

NDT : DAYR traduit ici par automne est une saison correspondant aux mois d'août, septembre et octobre. C'est la fin de la saison des pluies et le début de la saison sèche dans les hauts plateaux.

8 NAANI

NAAGI MAASHAYAW
WAA NAFTAADA E
NAANIDA HA JABIN
OO NINKA HA DILIN

Baryihii hore dumarku ma maali jirin lo'da. Haddii la helana dhif bay ahaayeen. Waxaana looga biqi jiray in lo'du dhibaato u geysato dumarka. Waana ka hayinka ah ee iyaga ogol ka lala hadlayaa oo isa soo maqiiqay, wuxuuna jiidhi gaadhay darkii iyo kii shubaasha gacanta ku hayey, waana kaa iyo kii la masso ah, ee halis galiya wixii u dan ah kuwa ujeedadu u dhacaysaa.

TOI QUI TE LAISSE TRAIRE PAR UNE FEMME
PENSE A TA SURVIE
NE CASSE PAS L'ABREUVOIR
NE BLESSE PAS L'HOMME

La traite des vaches, sauf si elles sont particulièrement dociles, est en général réservée aux hommes.

Cette chanson rappelle à une vache docile qui s'impatiente au puits que c'est le travail de l'homme qui la fait vivre en lui tirant l'eau du puits et en la menant aux meilleurs pâturages.

9 NAALLO

NOOLI KULANTEE
NAASAHAAGAAN
NAQ DANBEED IYO
NAALLO KU OGAHAY

Tiriyuhu wuxuu tixdan tiriyey xilli neefkii u maali jiray caano gabay. Isaga oo la hadlaaya ayey murtidiisu leedahay, haddii sac yahaw xusulkeen ka sareeyo xabaal, oo aynu waaro, waxa hubaal ah inaan kulmi doono, oo aan ka nasan wixii dhibaato iga kaa soo gaadhay, waana naasa-haaga kuwa aan ku ogahay inaan ka heli abaalka aan rabo. Dulucda heestuna waxa tahay, in wixii loo dadaalo wuxuun laga dheefi loona aayi.

AU REVOIR
TES MAMELLES
ME RESERVENT
D'AUTRES NOURRITURES

Le berger chante cette chanson lorsqu'il donne à boire à des vaches pleines qui ont cessé de donner du lait. Sa peine ne sera récompensée que plus tard, lorsqu'elles mettront bas.

10 TARAN

AD KU TARANTIDE
TUURTA HARAWIYO
TODOB DHALISTIYO
TAADHIDA HA DAYN

Si aad u tarantid saddex midna ha dayn sacyahaw, ku noolaashaha tuurta harawo, oo ah barwaaqo, mataanaynta iyo gu walba bilawgiisa oo ad dhashid.

POUR PROSPERER
NE QUITTE PAS LA MONTAGNE HARAWA
NE CESSE PAS DE METTRE BAS
A CHAQUE PRINTEMPS
ET DE FAIRE DES JUMENTS

NDT :
Le mot TODOB traduit ici, par printemps, n'est qu'une courte période d'une quinzaine de jours correspondant à la deuxième moitié du mois de mars.

11 HAAQOQ

WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ

Qaarba si aad u tarantid saddex midna ha dayn sacyahaw, ku noolaashaha tuurta harawo, oo ah barwaaqo, mataanaynta iyo gu walba bilawgiisa oo ad dhashid.



WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ



WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ
WAA HAAQOQ



11 HAAGOOG


GEED HAGOOGANI
 WAA HADH DABACSAN
 NAAG HAGOOGANI
 WAA HANGALA SIDA
 GIIR HAGOOGANI
 WAA HALTAGE QABE
 WILL HAGOOGANI
 WAA HAD UUN DILE

Geedka si wanaagsan u baxa, ee laamihiisu iswada haystaan, ama se cufan yihiin, aad buu u hadh macaan yahay. Reer baadiyaha dumarkoodu ma hagoogan jirin, ta hagoogatana waxa loo yiqiin tu weeran. Naagta Soomaliyeed ee hangal sida, ama weeran, waxa caado ahaan loo yaqaan in Seygeedii geeriyooday, ama ha la dilo, ama bes ha u dhintee. Waxa se jirtey, tu kale oo iyada oon laga geeriyoon ay caado u ahayd hagoog, ama hillaab joogto ah, taasna waxa loo arki jirey belo sheeg, ama belo sahidiya. Iminka se hagoogtaas oo kale lama shu'aysto, oo looma arko ba' iyo hoog tu farinaysa.

UN ARBRE COUVERT
 DONNE DE L'OMBRE
 UNE FEMME COUVERTE
 EST EN DEUIL
 UN BŒUF COUVERT
 EST SANS DEFENSE
 UN JEUNE HOMME COUVERT
 VA SE VENGER

1. Les femmes nomades ne se voilent que pour le deuil de leurs maris tués au combat ou décédés de mort naturelle. Le voile de la femme en dehors de cette occasion est considéré comme un présage de malheur. Pour les hommes, le voile possède une autre signification, un homme peut se voiler si un de ses parents proches a été tué. Sa tête restera alors couverte tant qu'il n'aura pas accompli sa vengeance.
2. Un bœuf couvert est celui qui a les cornes recourbées vers le bas et qui se trouve donc désarmé.

WACARACHAAN
 WACARACHAAN
 WACARACHAAN
 WACARACHAAN
 WACARACHAAN
 WACARACHAAN
 WACARACHAAN
 WACARACHAAN
 WACARACHAAN
 WACARACHAAN
 WACARACHAAN



12 HINDHADHIR

HAAMAHAAGII
 HABEEN IYO SUBAX
 HINDHAADHIRI JIRAY
 HADHUUDH LAGU SHUBAY

Marka arlada barwaaqo jirto, haamuhu caano ayey la ceegaagsa-
 maan. Wax kalena inta badan laguma shubto. Murtiduna waxa ay inna
 tusaysaa in tiriyaha tixdu heestan tiriyey mar ay abaari dhaharatay, oo
 halkii caanaha lagaga shubi jiray haamaha, lagu badalay hadhuudh.
 Sidaana waxa ugu wacnaa caano la'aan.

LES JARRES
 QUE TON LAIT
 FAISAIT RESONNER MATIN ET SOIR
 LES VOILA PLEINES DE DOURAH

Pendant les bonnes années, lorsque les pluies ont fait pousser l'herbe,
 les nomades se nourrissent exclusivement de leur aliment préféré, le
 lait. Les animaux en produisent abondamment matin et soir.
 Le chanteur qui vit une période de sécheresse regrette de devoir se
 contenter de céréales.

NDT :

Il s'agit ici de récipients, fabriqués à l'aide de fibres végétales tressées,
 qui recueillent l'eau, le lait et le beurre. Leurs parois intérieures sont
 imperméabilisées par une mince couche de goudron déposée en
 fumée et obtenue à partir de plantes spéciales.

13 HAWIRAN

MEEL AAN LOO HUBIN
OON HORSEED TAGIN
LOOMA HAADSHOO
WEY HAWIRANTAA

Haddii marka hore horseed jirin soo indha indheeya halka daaq iyo biyo leh, ma habboona in lo'da loo raro, laguna hungoobo. Haddii se taasi dhacdo waa lagu niyad jabaa, waana tacab khasaare.

Dulucda tixduna waxa ay tahay, tusaalo inna tusaysa inay habboon tahay talaabadii la rabo in la qaado in laga fiirsado, oo wixii talo iyo tab ah ee ku saabsan wax qabasho, laga baaraandego, waxtarkeedna la ogaado, oon la dhaafin sida dantu ku jirto.

NE LES EMMENEZ PAS
VERS UN LIEU PEU SUR
QU'UN GUIDE N'A PAS VU
ILS SERONT DEÇUS

Lorsque les pâturages des environs du campement ont été épuisés, ce dernier déménage pour s'installer plus loin. Mais les nomades ne se déplacent jamais sans savoir exactement où ils vont. Après avoir pris des renseignements précis d'autres voyageurs, c'est souvent un ou deux hommes du campement qui partent repérer l'endroit et vérifier ses points d'eau et ses pâturages.

14 ABEYDIN

AFAR FOOLLAHA
AABO MOOYEE
AAN AF KALE BARAN
ABAYDINIYAAAY

Afar fooluhu waa ilmaha gu jirka ah, ee afarta fool ee hore u soo bexeen, af soomaaligana ka yaqaan aabo.


Waxa jirta sida caadada ah, da' ilmaha naaska hooyadii ay habboon tahay in laga gooyo. Aalaaba taasi waxa ay dhacdaa marka ilmuhu yeesho afar fool oo u wax ku yeelo naaska hooyadii, iyo marka ay ka gabloosho, oo u godol ka waayo.


Waxa kale oo jirta haddii ilmaha hooyadii dhimato inuu u baahdo daryeel iyo xannaano guud ka sokow wax u badala caanihii u naaskeeda ku qabay. Taana waxa laga heli karaa geela ama lo'da.

NOURRISSEZ
L'ENFANT QUI MET SES DENTS
ET QUI NE SAIT DIRE
QUE PAPA

C'est lorsque l'enfant a mis ses premières dents que sa mère cesse de le nourrir.

La chanson souligne la faiblesse de l'enfant à cet âge-là et le recommande aux animaux qui doivent désormais l'élever de leur lait.





15 GIIRE

SADDEX GOBONIMO
 OONAD GARANAYN
 GIIRE MOOYEE
 GEELU KU LAMA LEH
 GADHOODH GOOGO'AN
 OO LA GALAB LULO
 SAANTA GOGOSHA AH
 EE GURYAHA TAAL
 GEESKA FIDHINKA AH
 EE GUJADA KULUL

Waxa caado u ah in xifaalo ka dhexayso lo'layda iyo geel dhaqatada Somaaliyeed. Ninka tixdan tiriyey wuxuu ka mid ahaa inta ku dhaqanta lo'da, kuna dhaadata dhaqshadeed. Tixduna waxay tilmaamaysaa, saddex arimood oo geelu la wadaagin lo'da, waana, saanta gogosha laga dhigo, caano gadhoodha oo la galab lulo, subagna lagala baxo, geesaha fidhinka ah, ee uu iskaga rabo wixii dagaal kala hor yimaad.

TU PRESENTES POUR GUIRRE
 SANS LE SAVOIR
 TROIS AVANTAGES SUR LA CHAMELLE
 LE LAIT BIEN CAILLE
 QUE L'ON BAT LE SOIR
 LA PEAU QUI SERT DE COUCHE
 DANS LES MAISONS
 LA CORNE POINTUE
 QUI FAIT MAL

Cette chanson s'adresse à la vache.

NDT :
 GUIRRE est un nom d'homme qui dans cette chanson désigne l'homme en général.

AWRA DHAAN BUU
 DHAAMINAYAA
 ANNA DHABARKIYO
 MEEL DHEXDAAYAAN
 DHAWR ISLEEYAHAY

Tixdu waxay ay muujinaysaa in ka darka shubaayey u daalay, dhabarkana dhibaato awgeed uga foorarsan waayey. Wuxuuna dherersaday neefka si u dhaan dhaaminaayo, ama dhaami leeyahay biyaha ku sii ganooda.

Labadu, kala war la ; midi xilka saaran buu lahaa ha ka badh tegin, ee sidda habboon u oofi, daalla wuu u dheeraa, ka kalina in u dhiman darteed ayuu ugu sii jeeday biyaha, oonkana reeb buu lahaa.

Ujeedada tixdu waa tu sheegeysa in qofkii xil saaran yahayba u nasan, karo kolka waajibkiisa sida la rabo uga soo baxo.

LE CHAMEAU DOIT FAIRE
 SA RÉSERVED'EAU
 ET MOI PLIE EN DEUX
 JE VOUDRAIS REPOSER MON DOS

Le chameau résiste longtemps à la soif, mais une fois au puits, il doit boire beaucoup d'eau.

GEES GURACANLAW
 SAAKA GEEDIGU
 WAA GURACAN GUUR
 OO LA GARAN WAA

Tixdu waxa ay sheegaysaa, in geediga loo raray, ama se lagu wado meel aan la sahamin oon ku haboonayn. Talada lagu rarayna ay u maroorto sida geeska saca lagu hal qabsaday.

Haddaba, haddii talo kasta aan la falanqayn, oon la qaadaa dhigin si cilmiyana la iskula meel dhigin, wey adag tahay sida ay u meel marto una noqoto tu tisqaadda oo loo aayo.

OH CORNE TORDUE !
 LE VOYAGE CE MATIN
 EST TORTUEUX
 ET INCERTAIN

Le troupeau se déplace à la quête d'un nouveau pâturage. Mais le berger n'est pas très sûr de son chemin qu'il compare à la corne tordue d'une vache. (CORNE TORDUE est le nom de la vache). Le nouveau pâturage n'a certainement pas été reconnu d'avance et une bonne concertation n'a pas précédé la décision du voyage.

18 MATAANO

MID MIDEEYOO
MAR GEELLEYYOO
MAANTA DABADEED
MATAANO HA DHALIN

Sac waligiiba mataanayn jiray ayaa tixdan loola jeeday. Waana waano odhanaysa sac yahaw ha isku dhalin mataano danbe. Taana waxa la timid taag daro laga dareemay, ka lihina wuxuu ka baqay inuu sacu dhinto, hadduu mataaneeyo mar kale.

COMME LES CHAMELLES
FAIS DES PORTEES UNIQUES
ET A PARTIR D'AUJOURD'HUI
NE DONNE PLUS DE JUMEAUX

Il s'agit d'une vache usée par plusieurs portées doubles et à qui son propriétaire, pour ne pas la perdre, souhaite des portées uniques.

19 HABANAAN

HOOTADAADIYO
NAAG HUNGURI XUMI
ISKUMA HABANA
ISMANA HURAAN
HADHAAGAAGIYO
HAL DHURWAAYIHI
ISKUMA HABANA
ISMANA HURAAN
HORMADAADIYO
WIIL HULEEDHAA
ISKUMA HABANA
ISMANA HURAAN

Naagta hunguriga xun ee saluuga badan, kuna darsatay yaayuul, iyo neefka gabnada ihi waxba iskuma ah, allaana isbaday oo meel ay kala tegi ma jirto, hadda oo midkood dahda mooye.

Neefka hadhaaga ah iyo dhurwaaguna inay kulmaan ma haboona, waxaana suuragal ah inuu mar uun waayuhu kulmiyo, haaddana loo wadho neefkaas.

Wiil aan feejigneyn, hawlkarra ahayn iyo xoolaha Guulle baday iskuma wanaagsana, cid kalena looma hayo oo wey ishuran yihiin.


LORSQUE TU DONNES PEU DE LAIT
TU NE PEUX PAS ALLER
AVEC UNE FEMME EXIGEANTE
C'EST POURTANT INEVITABLE

LORSQUE TU TRAINES A LA MARCHE
TU NE PEUX PAS ALLER
AVEC UNE HYENE
C'EST POURTANT INEVITABLE

ET EN TANT QUE TROUPEAU
TU NE PEUX PAS ALLER
AVEC UN BERGER FATIGUE
C'EST POURTANT INEVITABLE

20 ERGISO

ASHKIRO ERGOOY
ERGISAHA FARAS
EEN NIN LIHI WADAN
UL LOOGAMA TUDHO
WAANA LA ERYAA



Saca lagu hal qabsaday, ayaa markaas gacan kale oo tii lahayd ahayn ku jiray. Guud ahaan waxa ay murtidu inna tusaysaa, in wixii mood iyo noola ee la amaanaysto ay baylahsan yihiin. Si aan sameynna loogu dhaqmo, waxtarka ay leeyihiinna lama arko, oo looma tixgaliyo.

OH ! ASHKIR LA PRETEE !
LE CHEVAL EMPRUNTE
SEPRE DE SON MAITRE
EST BASTONNE SANS PITIE
ET POUSSE AU GALOP

Ashkir est le nom de la vache prêtée qui comme tout animal loin de son maître est maltraitée.


21 FARAW

SIDII FARAW DIDAY
OY FARDO ERYEEN
FANKII WADA DADAB
OO FULLIIN DAMAC

Farawgu waa jaad ka mid ah gammaanka, oo dibad galeena. Wuxuuna leeyahay oogo daliigo dhaadheer leh, iskuguna dhafan cadaan iyo madow. Marka farso lagu eryo, ama si kaleba loo baacsado wey fan jeediyaan. Waa sidoo kale lo'da iyo geeluna, marka ay darka ka fulaan ayey caasha u dadbaan tubtay ka soo arooreen.

TELS DES ZEBRES EFFRAYES
POURSUIVIS PAR DES CAVALIERS
ILS TENDENT LEURS COUS
ET RASSASIES, VEULENT S'EN ALLER

Le chanteur s'adresse à un troupeau de vaches ou de chameaux qui a fini de boire
Les animaux se tournent tous vers le chemin du retour, ils ont oublié leur soif et sont impatients de rejoindre leur campement situé souvent à plusieurs heures de marche.



22 MAAX

*JEERUU MIISAAN
MAAXDA HORE DHAMO
MIYIR MA LIHIYE
MUSLIN ALLAW
YAAN LA MOOGAAN*

In kasta oo tiriyaha tixdu ku halqabsaday sac, haddana murtidu waxay saamaynaysaa dhammaan lo'da oo idil. Ujeeddaduna waxay muujinaysaa in intay oomman tahay isna uu miyir laa yahay, wuxuu falayana uunan garanayn. Waana afeef dhigasho ujeedadeed tahay in loo dulqaato haddii uu gafo.

*TANT QUE MIISAN
N'A PAS BU L'EAU CLAIRE
JE N'AI PAS TOUS MES ESPRITS
VOUS LES MUSULMANS
NE L'OUBLIEZ PAS*

- Miisan est le nom d'une vache
- Les bergers se disputent la première place au puits pour servir à leurs bêtes, les eaux claires qui se sont décantées la nuit. Les puits sont rarement abondants, le niveau de l'eau baisse et elle devient de plus en plus boueuse.

23 MAYDHAQ

MAYDHAQAAGII
MIIGSANAAN JIRAY
SAWKA MUUDSAMAY


Iyada oo waxyaabo fara badani keeni karaan isbedelka ku dhaca oogada naflayda, ayaa loo malayn karaa in markii tixdan la tiriyey abaar arlada kibtay dhacday.

Waxaana u daliila, ku halqabsiga neef bari samaadkii oogadiisu giigsi-nyd, oo ay sigibtirayd, quruxina ka muuqatay, oo lafta iyo saantu isku dhegeen.

TES FLANCS
BIEN TENDUS
LES VOILA FONDUS

Le chanteur déplore les effets de la sécheresse sur ses animaux qui ont maigri et n'ont plus que la peau et les os.

YALUO ODE LADDAH
YALUO WA 75 770H
YALUO HAWWIS WOO
YALUO AFA LAMUN



25 ILWAAD

ILWAAD ARARTII
IN LA NACAY MOOD
OO ILMADA SEYDH
WAA SE LA OG YAHAY

Waxa dhacday in saca laba maalmood aan la waraabin, maalin sad-dexaaddiina u ku raagay ararta. Wuxuuna u qaatay inuu ka qatanaan doono maantana biyaha. Deedna ci laga dhadhansaday calaacal ayuu ciyey, oo lagu tilmaamikaro tu cabasho. Waana markaa kolkuu ku leeyahay, ku afgartee ha biqin oo ha calaacalin maantana oon ku joogimayside.

ILWAAD BEUGLE TRISTEMENT
ELLE SE CROIT DELAISSEE
ELLE VERSE DES LARMES
MAIS ON PENSE A ELLE

Ilwaad, est une vache qui n'a pas bu deux jours successifs. Au troisième jour, elle est impatiente d'aller au puits, mais le berger laisse traîner le troupeau au pâturage.

HADDUU ROOB DA'O
 OO RAMASH BAXO
 HAAN RUGLAYSIO
 RAAXO WAA ADI
 RUUXU WAA GEEL
 REERA WAA ADHI

Heestan waxa tiriyey nin ku dhaqmay lo'da. Wuxuuna ka waramayaa baadhaadhaha ay leedahay barisamaadkii. Wuxuna dhaliilsanaa geela oo u ku tilmaamay dhaqashadiisu mid ah dhaadasho. Adhigana tix tiriyuhu wuxuu siiyey aqoonsi, iyo inuu yahay lagama maarmaan.

LORSQUE LA PLUIE ARRIVE
 ET QUE L'HERBE POUSSE
 LES OUTRES QUI BATTENT LA MESURE
 ET LE BONHEUR : C'EST TOI
 LES CHAMELLES N'ONT QUE LE PRESTIGE
 ET LES BREBIS LA SECURITE

Le chanteur qui possède des vaches, fait ici leur éloge en période de pluie.

NDT :

– Outres : voir note de la chanson 15

Le mot "Adhi" traduit ici simplement par brebis est un nom collectif désignant à la fois les moutons et les chèvres.

SADDEX WEEDHOOD
 OO WAR LAGU HELO
 WEYNAW KAA HAY
 WEERAR BAA GALAY
 WIILKII JIRAY DHIMAY
 WEYLI KAMA HADHIN

Tixdani waa duco loogu Alla baryaayo lo'da si Eebe uga hayo balaaya-da, gaar ahaan saddexda kor ku magacaaban. Waxayna kala yihiin, weerar col ku soo qaado, wiilkii jiray ee nafteeda lahaa oo dhinta, iyo neefkiyoo dhinta isaga oo weyli ka hadhin. Intaa weeye inta Guule laga tuugayaa inuu ka hayo lo'da.

PUISSE LE TRES HAUT VOUS PROTEGER
 DE TROIS ANNONCES :
 LES PILLARDS LES ONT ENLEVES
 LEUR BERGER EST MORT
 IL N'EN RESTE PLUS UN VEAU

28 WAARIS

HADDUU WEYL DHALO
ASU WEYL KALE
WALACEED YAHAY
U WADADA MARO
WAARIS ODAYLOW

Naflayda inta dhidig ee Eebe ku arsaayo ubad, dhakhsey u illaawaan eedaadka ka soo mara dhalmada. Sacan lagu hal qabsadayna hadduu weyl dhalo, oo isaga oon ka soo kaban diiftii hore tu kale walaceed noqdo, wuxuu yeeshaa markuu wadada mari socodka waayeel culus.

LORSQU'ELLE A FAIT UN VEAU
ET QU'ELLE EST ENCORE PLEINE
SA DEMARCHE SUR LE CHEMIN
EST CELLE D'UN VIEILLARD

La femelle en question est déjà pleine sans avoir eu le temps de se rétablir de la naissance précédente.

29 KAYD

KABASHO U DHIMAN
AAYAR KAMA TAGE
KAYD U HAYSTANA
KAL GEEL KUMA QADE

Waxa muuqata in ninka tixdan tiriyey lo' dhaqato ahaa, hase yeeshee uu hore ugu soo dhaqmay geel, haddaanu ku soo dhaqminna aqoon u lahaa kal waraabka lo'da iyo geela.

Haddaba, siduu u shubaayey darka ayuu dareemay daal, wuxuuna arkay sii gannoodkii lo'da, waa kolkaa, markuu ku dhaga hadlay, ee u ku yidhi ; kabasho kuu dhiman kaga tagimeysid biyaha, inta geel ku qadana wallee kuma qadid.

S'IL TE MANQUE UNE GORGEE
TU N'ABANDONNES PAS LE PUIITS
ET TU NE VIS PAS SUR TA RESERVE
AUSSI LONGTEMPS QUE LE CHAMEAU

Cette chanson destinée à une vache montre sa faible résistance à la soif.

30 HORID

ADOO HOOTO AH
OO HADHAALE AH
OO HIRDINA BADAN
LO'DA KA HORTEED
HA LA ISOO HORO
SIDEED KU HESHA

Tiriyaha tixdani isaga oo la hadlaaya sac u lahaa ayuu ku leeyahay sac yahaw adoo gabno ah, oo caano yar, lo'dana aan la socon karin, oo waliba xasarad badan, sideed ku garatay aan kuwa kale hortood fulo.

Tixdu waxay caddayneysaa, in wixii faa'iida li'iba culays ku hayo ciddii ka mas'uula, xasarad hadduu ku darsadana looma tawaabo, waana la hatigaa. Waxaana la maso ah neefkaas, qof karti laawe ah, oo dabecad xun, laguna sheegi karo xadhig lama sitaan, oo raba inuu ka mudnaado asaagiis, qayb libaaxna u helo.

TU DONNES PEU DE LAIT
TU TRAINES PENDANT LA MARCHE
COMMENT VEUX-TU
QU'ON TE DONNE A BOIRE
AVANT LES AUTRES ?

31 CAWO

CIRKU CAAD LEH
DHULKU CAWS LEH
CEELKU BIYO LEH
KAAGAN CIYAYEE
CALAACALAYAA
CALOOL NUGULAA
MUU CAWADII SUGO

Cirku daruuro iyo astaamo sheegaaya inuu roob di'i ayuu leeyahay. Baad iyo biyana wali waa la haystaa. Wax dhibaataysan iyo wax tabaalaysan toona ma aragno, ee kan ciyayaa sal nugulaa, muxuu la calaacali, miyuu ka dhursugo nasiibkii iyo saadaasha wanaagsan ee lagu niyad san yahay, samaduna ay farin.

IL Y A DES NUAGES DANS LE CIEL
DE LA PAILLE SUR LA TERRE
DE L'EAU DANS LE PUIIS
ET TOI TU BEUGLES
ET TU TE PLAINS
QUE TU ES IMPATIENTE
POURQUOI N'ATTENDS-TU PAS TA CHANCE ?

A la veille d'une saison des pluies, la vache manifeste son impatience de brouter l'herbe verte et tendre.



WEYSHA KAA YARI
WAA WALAASHAA
HA WAREEMINE
WAABIYOO DHAAF

Xooluhu sida dhacda wey kala garaad roon yihiin.
Kuwa garaadka sani kuma taagsadaan intay ka taag roon yihiin, siiba
inta yar yar.

Dulucda tixdu waxa ay inna faraysaa, in la isku tamar sheegan, oo ka
taagta rooni ku durdurin ka si uun uga liita, ee waayuhu wahabka saa-
ray.

TU ES PLUS FORTE QUE LE VEAU
TU ES PLUS GRANDE QUE LUI
MENACE LE SANS FRAPPER

La chanson s'adresse à une vache qui frappe les veaux.

33 MURUGO

CIRKU MAYAY BUU
LA MADAW YAHAY
MAGAAL MIDAB BUU
LA MADAW YAHAY
MASKU MALAG BUU
LA MADAW YAHAY
CEELKU MAAX BUU
LA MADAW YAHAY
ANNA MURUGIYO
MAXAY MUDAN BAAN
LA MADOOBAHAY

Cirku wuxuu madoobaadaa marka dhamaantiis daruuro biyo xambaarsani ay shareeraan. Magaal oo ah saca lagu halqabsadayna midabkiisaa madoobaa. Maska dilaaga ihina markuu dhiidhiyo waa-baydu cudhkay iskugu ururtaa, oo iyadaa ka midabkiisu madaw yahayna sii madoobaysa, ka kalena ka yeesha madow. Ceelka gunta dheerina markuu si wanaagsan u maaxsamo madaw mooyee waxa guntiisa ku jira lama arko. Tix tiriyuhuna uma dhalan madawgee, waa astaan murugo oo kala soo daristay fikirka iyo siduu u daryeeli lahaa ugana badbaadin lahaa lo'da abaarta faraha baas ku haysa.

LE CIEL EST NOIR
D'AVERSES
MAGAAL EST NOIRE
C'EST SA COULEUR
LE SERPENT EST NOIR
DE VENIN
LE PUIITS EST NOIR
DE SON EAU
LA MER EST NOIRE
DE RICHESSE
ET MOI JE SUIS NOIR
DE TRISTESSE
ET D'INQUIETUDE SUR L'AVENIR

MAGAAL est le nom d'une vache

AYAA GOBOLKAA
GAWRACA OO GADA
AYAA GOBOLKAA
GEEDO KU XIDHXIDHA
AYAA GOBOLKAA,
RAARI GEDEFIYO
CEELAN GAMASHIYIN
ISKU GARAB DHIGA
OO GU IYO DAYR
GAAWAHA U CUGA

Murtidani lo'dii waxa ay u kala saartay saddex qaybood. Qayb gabno ah, oo camal xun, waana ta gawraca loo qoondeeyey iyo gada-shada. In caato ah oo cad iyo muuqaal midna aan lahayn, kuna haboon in la qadiyo. Ta saddexaad waa ayro nasab ah, oo u la jeclaaday inay dhaqaale wanaagsan hesho, kuna noolaato meel tigaaddu iska dul-baxday, biyaha ceelkuna iska dhimin, oo gu' iyo dayrna gorofka loo-cugo.

Aadamuhu isna ma wada sinna, badh baa jira tag xun, waxyeello, mooyee waxtar aan lahayn, tilmaantooduna tahay xadhig lama sitaan, iyo faraha laga qaad. Dar baa jira wax kasta oo loo qabto ka fara madhan, oo had iyo jeer baahan oon qaboobin. Kuwaa tag iyo taran leh, loona bogaa siday wax u fuliyaan iyo waxtarka ay u leeyihiin bulshaday la dhaqmaan. Ka shidaal qaadashadooduna tahay tu habboon, salkana ku haysa karti iyo hufnaan.

Saddexda lama masayn karo, sed oo laga simaana intay danbi tahay ayey kasmaha aadamahana ka baxsan tahay.

UNE DE TES PARTS MERITE
D'ETRE TUEE ET VENDUE
UNE DE TES PARTS MERITE
D'ETRE ATTACHEE AUX ARBRES
UNE DE TES PARTS MERITE
DES TOUFFES DE HAUTES HERBES
PRES D'UN PUIITS ABONDANT
ET DES POTS QU'ON FUME
ETE COMME HIVER

Cette chanson est destinée à un troupeau de vaches qu'elle partage en trois :

– La première partie est constituée de vaches qui donnent peu de lait ou qui ont mauvais caractère.

– La deuxième comprend les vaches trop vieilles et trop faibles. Elles ne donnent plus de lait et leur viande n'est plus bonne. Celles-là devraient être affamées.


– La troisième enfin est celle où l'on trouve les meilleures vaches laitières.

XIGAALIYO XIDID
MIDNA MA XISHMADE
XAY MIYAA YIMID ?

Inta isbidda inay iskaga sokeeyaan dadka kale ee isku isira ama walcan ah, dadka qaara si gaar ah u tixgeliyaan, iyo kuwa guurku isku keeno ee qadarintoodu lama huraanka tahay, markay hawsha waraabka ku jiraan, dharkay ismoogaan u dhigtaan oo ma xaaleeyaan xayada. Dan iyo xaragona horay isku waayeen.

XAY EST ARRIVEE
QUI NE RESPECTE
NI LES LIENS DU MARIAGE
NI CEUX DU SANG

- XAY est le nom d'une vache
- A leur arrivée au puits, l'exigence des vaches est telle qu'elles font travailler tout le monde.



36 DAR

DUUDKA SARARTIYO
DILLOOY MURUQYADA
ANOON DIB U DHIGAN
KUU DINDIMIYEYE
MA DARKAA JABAN ?
MA ADIGAA DURAN ?

Tixtiriyuhu markuu darkii shubay, ee u waliba shubay ayuu dareemay daal. Kolkuu arkay lo'diiyo sii gannoodana yaab ayuu Eebe u keenay, wuxuuna garan waayey waxa dhacay ee lo'du ay la foorarto. Waana markaa markay talo ku ciirtay ee u weydiiyey su'aasha odhaneysa : dillooy waxaan iskula hadhay ma jirto, intii aan ciidmi lahaana qabtee, ma darka jaban oo biyaha celineyn, mise adaa taqaluf ah oo wax kugu filaan karaa jirin ?

DILLO JE N'ECONOMISE
NI MON DOS ET MES COTES
NI MES MUSCLES
POUR TE DONNER A BOIRE
L'ABREUVOIR EST-IL CASSE ?
ES-TU TROP VORACE ?

- DILLO est le nom d'une vache.
- Le berger est à bout de force, mais les vaches ont encore soif.

**INTA GIIRBA
GEES MADAW YAHAY
GEELAW YEELKAA**

Waxa ka muuqata dulucda murtidan in ka tiriyey yahay lo'lay ka soo horjeedda mudnaanta geela lagu sheego. Taasna waxa tusmo u ah ujeedadiisa odhanaysa, inta lo'du ay ifka ku nooshahay geelow iyadaa kaa mudan oon kalsooni ku qabaa, danna kaama lihiye yeelkaa.

**TANT QUE GUIRRE
A LA CORNE NOIRE
TANT PIS POUR LES CHAMELLES**

NDT :

- Le chanteur tant qu'il lui restera une seule vache préférera les vaches aux chamelles.
- Guirre est le nom d'une vache
- La corne est noire (de couleur sombre) pendant qu'elle est vivante.

WATA DUNDA
YAHAY WADAN YAHAY
GEESEW YEEYAA



GURMAD KAAGOON
GEENYO BADISIYO
WIIL GADOODIYO
GUUTO ADAG IYO
GEESIYAAL WADAN
GALBAYE OGOOW
OO HA SUGINE GUUL

Murtidan oo lagula hadli karo geel iyo lo'ba, waxay ay tahay laba gar-
daaq. Tiriyuhu wuxuu la hadlayaa labada midkood. Wuxuuna leeya-
hay, haddii la idin dhaco, oo gurmadkiina, aynan ku jirin geenyo badisa
oo markaaba lagu gaadho colka, wiil ka dhiidhiya gardarada oo ka
qaada talaabo habboon iyo koox hubeysan, geesiyaalla u yihiin abaan-
duulayaal, meeshay ku dhaqaaqaanna guul la'aan dib uga soo laab-
min. Ogow haddaba inay guuli kaa fog tahay, oo haddii aad gacan gas-
hidna soo noqodkaa adag yahay.

SI UNE JUMENT RAPIDE
UN GARÇON EN COLERE
ET UNE FORTE TROUPE
CONDUITE PAR DES BRAVES
NE VIENNENT PAS A TON SECOURS
SACHE QUE TU ES PERDU
ET N'ESPERE PAS DE VICTOIRE

NTD :
En cas de guerre, le pillage des troupeaux de la tribu ennemie se prati-
que couramment chez les nomades. Il constitue un défi dont les victi-
mes pour récupérer leurs biens, doivent s'organiser rapidement, rat-
traper les pillards et livrer une dure bataille.
C'est ce que le chanteur rappelle ici à son troupeau.

LAAFYAHAYGIYO
LAASKA GAABANI
WEY KU LUMIYEEN

Tixdan waxa ay tilmaamaysaa, ama se sheegaysaa in meesha laga waraabinaayey xooluhu ahayd meel si fudud uga fulaan, ka darka shubayeyna aynan dhibaato ku hayn si xarago ku jirtona uga bixi jiray hawsha. Taana waxa ugu wacnaa laaska gaaban ee biyaha badan.

Wuxuu se dareemay tiriyaha tixdu, in xooluhu ku walfeen sida fudud ee ay ku haqabbeelayeen. Waxayna noqotay, haddii ay la kulmaan meel biyo yar, darkana laga shubo ceelal dhawr shub ah, inayna kollaba sabir yeelan doonin.

Si kale haddii loo eego, waa murti tusmo u ah, in naflaydu ku meel mari karin kaalmo si fudud ay u hesho. Taas oo lagu simaadi karo ayaamo tirsan oo la mid ah bil saddex ah.

TA BELLE DEMARCHE
VERS LE PUIIS PEU PROFOND
T'A MAL HABITUEE

L'eau abondante et près du pâturage n'exige aucun effort.
Le troupeau va au puits sans forcer la marche et le berger tire l'eau sans difficultés.
La chanson met en garde contre ces facilités qui ne dureront pas.

SOO AROORKIYO
AROOR MAALKUBA
WAA AXDI ALLOO
WAAN ISKU OGAYN

Tixdu waa tu muujinaysa axdi ka dhexeeya, oo hor eebe ay ku galeen, geel iyo lo', kolba kii loola jeedo iyo ka leh ama ka jira. Axdigaas oo ah, in geel iyo lo'ba la maalo, laguna intifaaco oontooda, iyana aroor, daaq iyo kolba sida ku habboon lagu dhaqo, lana daryeelo jiritaankooda.

TE DONNER DE L'EAU
ME DONNER DU LAIT
C'EST LE PACTE DIVIN
QUI NOUS LIE

41 GUDUUDANE

GUDUUDANIHII
GUGII LAGA LULAY
GADH MADOOBIYO
GAMBOOLAY BAA
ISKU GACASHADAY
ANNA GO'AYOO
GOOR XUN SOCOD IYO
GUURAHAY DILAY



Iyada oo hawsha reerku ka dhaxayso dadka guriga jooga qofba meel u kaga aadan yahayba, ayaa haddana dheefta guriga taal loo kala dhaw yahay. Markaa, ninka tixdan tiriyey wuxuu ina tusay inuu ahaa nin yarid ah. Intaa wuxuu raacshay, in odayga reerka, isnaantu habeenkii hoos ahaan u gunayso, isagana ardaaga lagaga tego, goorxun socodna u dheer yahay.

PENDANT QUE LES BARBUS
ET LEURS FEMMES
SE REGALENT DE BEURRE
QU'ELLES ONT PRODUIT AU PRINTEMPS
JE ME TUE
PAR TOUS LES TEMPS
DANS LES MARCHES NOCTURNES

Un jeune homme se sent privé, au profit des adultes, des réserves faites à la bonne saison alors qu'il continue à travailler durement pour la survie des bêtes en saison sèche.


DARKA RIGADA AH
EE RAGGU ALKUMAY
RIIXIMAYSIDE
HA ISA SOO RIDIN

Tixdu waa laba gardaaq. Waxaana lagula hadli karaa geel iyo lo' kolba kii la rabo. Waxayna leedahay darka rag baa ku farayaraystay oo farsa-
madoonii isugu geeyey, aadna wuu u adag yahay, waana hubaal inay-
daan dumin karin, riixina karimaysaane si miyir qabta u soo horma oo
u kala fula.

NE VOUS JETEZ PAS
SUR CET ABREUVOIR SOLIDE
CONCU PAR LES HOMMES
IL NE BOUGERA PAS

HA ADAGIR AMRAN
YANFUAJA UDDAR 33
303YANRIR
YNDR GOS ASLAK

Waxay ku jirta qaybta
Waxay ku jirta qaybta
Waxay ku jirta qaybta
Waxay ku jirta qaybta
Waxay ku jirta qaybta



VOUS VOUS RUEZ
TELS DES HOMMES AU COMBAT
SUR L'HERBE TENDRE
COMME SUR UNE RUCHE DE MIEL

SIDII RADIN MALAB
AMA REER DEGAY
RAARI MEELLABA
WUU KU RARAN YAHAY

Waxay ku jirta qaybta
Waxay ku jirta qaybta
Waxay ku jirta qaybta
Waxay ku jirta qaybta
Waxay ku jirta qaybta

Aad bay shinidu ugu uruurtaa radinta malabka, waxyna ka hirtaa oo ay ka horjoogsataa wixii damca inuu gurto dareensiyo. Waxa kale oo jirta kolka reer meel dego in cida xoolaha, saqadha iyo baaqu hugun abuuraa, indhuhuna waxay ku dhacaan dad qofba meel ku saloogan yahay, miyirkooduna ku eedan yahay dejinta reerka.

Intaba wuxuu ku simaaday tix tiriyuhu, geela iyo lo'da oo kolka ay baa-han yihiin cidi ka hor joogsan karin meeshii biyo, iyo baad leh. Marka la kala horayana hawda iyo hugunka ka baxaa waxay sawaabiyaan col isgalay ; oo dagaal ba'ni ka dhex socdo, ama reer degeya. Kala horuhuna wuu ku dhibaatoadaa, naftiisuna halis bayba ku gashaa.

VOUS VOUS RUEZ
TELS DES HOMMES AU COMBAT
SUR L'HERBE TENDRE
COMME SUR UNE RUCHE DE MIEL

44 GUBAN

*BARWAAQADA GUBAN
WAA BIL KALIYEE
BEERKA HA U LULIN*

Gubanku waa dhul kulul oo hooseeya. Waxaana u caado ah inuu tigaad hoosaad farabadan bixiyo inta roobku ku cusub yahay. Barwaaqadu se kuma sii waarto. Waxaana la moodaa in roob ku soo dhawaan. Waa sidaa darteed ta ku kaliftay inuu uga digo lo'da barwaaqada guban.

Haddaba murtidan nuxurkeedu waa mid odhanaysa ; "wakhtigu intuu-nan ku dhaafin wax ka transo, hana isa siin samihiisa oo ah midaan lagu waarayn.

*NE TE REJOUIS PAS
L'HERBE DE GUBAN
NE DURE QU'UN SEUL MOIS*

Guban est une région côtière chaude où, dès qu'il pleut, poussent des herbes courtes mais abondantes qui sèchent et meurent rapidement.

45 MADI

*HADDII MADI DHACO
OO MID KALE JIRIN
REERKU MEERYOO
MEEL KALUU DEGEY*

Tixdan waxa ka muuqta inuu tiriyey nin madi ahaa. Waxayna leedahay haddii ka madiga ihi u geeriyoodo oo uunan lahayn wiil iyo walaal kolba kii dhaxli lahaa, aduunkiisu wuxuu u wareegaa nin aan magaciisa iyo ka aabihii toona sii wadin.

Si kale haddii loo eego, hawlaha qaranka haddii aan loo tababarin cid sii wadda waxay taladoodu ku wareegtaa nimay lexjeclo ka hayn, inuu kuu taliyana raba abidkaa. Danahaagana aan meel marin, uguna talo-gala inay qabyo ahaadaan. Qoorshaha u dhigaana wuxuu salka ku hayaa kiisa iyo danaha cidda u yahay. Hana filin, oo ha sugin in maskax aan taada ahaynin ay kuu horseeddo badhaadhe iyo sareedo.

*SI UN FILS UNIQUE MEURT
SANS PERSONNE POUR PRENDRE SA RELEVÉ
SON CAMPÉMENT EST PERDU
ET RECUEILLI PAR D'AUTRES*

Cette chanson exprime la crainte du fils unique de disparaître avant d'avoir lui-même des fils assez grands pour prendre sa succession.

Si cela arrive, son nom et celui de son père risquent de ne pas se transmettre puisque sa femme, ses enfants en bas âge et ses biens tombent dans des mains étrangères.

NDT : Le mot REER traduit ici par campement est un nom collectif désignant tout ce qui appartient à un nomade : femmes, enfants, tentes et animaux.

MARKAAN MAQANAHAY
EEN MURUQYADA
KUU MITIDINAYN
AD MEERMEERTIDE
MAANTA SOO HIRO

Sida runtu tahay, hawlba ninkeed baa daryeela. Tixduna si toosa ayey u taabanaysa arintaas. Waxaana ka muuqata in neefka lagu halqabsaday uunan marraba hagarbeelayn hadduunan darka shubayn kii lahaa, oo waaba ka leh kolkaan joogin een xoogeyga kugu hagartireyn aad silicdide maanta soo hiro si wanaagsanna u ful.

LORSQUE JE SERAI ABSENT
ET QUE MES MUSCLES
NE TRAVAILLERONT PAS POUR TOI
TU POURRAS TRAINER
MAIS AUJOURD'HUI VIENS DROIT AU PUIITS

Cette chanson sert à conduire le troupeau au puits. Elle exprime la volonté du berger près à fournir tout le travail nécessaire pour tirer l'eau et désaltérer ses animaux.

WIILAAAN LAAFYAHA
KUU LABAA ROGIN
ADNA NAASAHA
HA U LULINOO
HA UGA LABAQSIIN

Nimaan u hawlgalin dantaa, oon u kacaakufin dartaa, adna dheefta naasahaaga ha ugu roonaan, hana baahitirin.

POUR UN GARÇON DONT LES BRAS
N'ONT PAS TRAVAILLE POUR TOI
N'AGITE PAS
ET NE BALANCE PAS
TES MAMELLES

48 BARGARAD

WALLEY BIDO DUMAR
OO BARGARAD DHALAY
BAKHAYL INAANTII
WAANAN BARANINE
KAAMA BIXIYEEN

Iyada oo soomalidu caado u lahayn in ninna soddogii hadal iyo hawraartoonu ku aflagaadeeyo, ayaa ninka tixdan tiriyey kala kulmay soddogii wax ku xambaaray inuu ka baxo xayndaabka dhaqanka.

Saca ama hasha lala hadlayo waxa loo bixiyey yarad. Ninkana waa la yabdhay, walina waa inan la yaal. Wuxuuna soddogii weydiistay inuu saca, ama hasha hebla ugu daro yabadhka. Soddogiina taa wuu diiday. Inantii u guursadayna waxay ku noqotay xadhig lama sitaan.

Isaga oo uurkutaaloonaya aadna uga xun arintaas ayuu neefkii la kulmay, markaasuu xasuustay bariguu ku jiray xeradiisa. Taasaana ka keentay calaacalka uguna wacnayd hibashada.

AU NOM DE DIEU
JE NE T'AURAI PAS DONNE
POUR UNE MECHANTE FEMME
FILLE D'UN AVARE
MAIS JE NE SAVAIS PAS

Contrairement à la tradition qui garantit le respect du gendre pour son beau-père, le chanteur, ici, se plaint de l'avarice de ce dernier. Il s'adresse à une vache ou une chamelle qu'il aimait particulièrement et qui a fait partie de la dot pour son mariage.

Les nouveaux mariés campent avec les parents de la fille. La coutume veut qu'au moment de leur départ pour s'installer chez la famille du mari, la belle-famille leur restitue une partie de la dot.

L'auteur de la chanson a demandé que sa chamelle ou sa vache préférée lui soit rendue.

N'étant pas, par ailleurs, satisfait de sa nouvelle femme, le refus du beau-père lui fait regretter son mariage.

49 KAALIN

KAALINTAAN DEGO
EEN DARKA AHAYN
HADDAAAN DOORSADO
INTA DUUSHIYO
DUUFKA MAAN CUNO

Soomaalida waxa u xeera in biyaha ceelka nin waliba kolkiisa cabbo, kaalintana ka baxo marka u toogadiisa dhammaysto. Wuxuu tilmaamay inay Soomaalida reer miyiga ihi aynan dhaqankooda ku jirin in shinbiraha iyo wixii duula toona aynan hilibkooda cunin.

Waxayna u la siman yihiin duufka aan la gayin. Isna hadduu hawsha u galo ka soo bixin, wuxuu isku tiriyey nin wax ma tare ah, oon waxba ku filayn. Abaalkiisuna yahay inuu ku noolado bakhtiga iyo wixii duula ee shinbiruhu ka mid yihiin.

SI J'ECHANGE MON POSTE
QUI N'EST PAS CELUI DE L'ABREUVOIR
QUE JE MANGE LES OISEAUX
ET LES CADAVRES D'ANIMAUX

Dans les régions désertiques les puits sont profonds et ont peu d'eau. Les nomades pour boire ou abreuver leurs animaux sont obligés de descendre à plusieurs dans le puits.

Ils se postent à intervalles réguliers sur toute sa profondeur et tirent l'eau avec un seau qu'ils font circuler de l'un à l'autre jusqu'à la surface. Il faut attraper le seau et le lancer au suivant sans perdre ni son équilibre ni une goutte de l'eau précieuse. Le dernier se contente de remplir l'abreuvoir ou les jarres, son travail est le plus facile.

En plus d'un apprentissage nécessaire, la chanson qui rythme et synchronise leurs mouvements est absolument indispensable.

Cette chanson qui les encourage à persévérer, nous apprend aussi que les nomades ne mangent pas les animaux qui volent et ceux qui n'ont pas été égorgés.

50 MADAL

MAANTA SILICDAYE
BARI SAMIROO
SANDANBIYO MADAL
SOO SALAAN CELI


Wakhtigu markasta ninna uma sama. Mar waa adi, marra waa qayrkaa. Haddaba, neefka lagu halqabsaday iyo intay hayb wadaagaan ayaa lagu leeyahay, maanta silic iyo saxariir ku cabtee bari intaa ku sabra balanteenna waa saandanbe oo idinka samaan maanta.

Waxa laga yaabaa, in maalintaa iyada ah ee ninkan xoolihiisu silica ku cabbeen u dhacay wax lama filaan ihi, sida ceelka oo biyihisu yaraa-deen, ciidan daro ama se cudud loo sheegtay.

*INSATISFAITS AUJOURD'HUI
PATIENTEZ ENCORE DEMAIN
ET RENDEZ-VOUS AU PUIITS
APRES-DEMAIN*

Le berger a été incapable de donner assez d'eau à son troupeau; le puits n'avait pas beaucoup d'eau ou était trop profond ou bien il a été chassé par d'autres bergers plus forts que lui.

Il promet que la prochaine fois il prendra toutes les dispositions pour faire boire ses animaux.



51 GOTIN

ANOO GAABNAA
OO GANTOOBNAA
KAALIN GIGAN IYO
MEEL GOTINA GALAY
OO MA GANI KARO

Tiriyaha tixdu maalintii u waraabka lahaa waxa ku soo hagaagtay meel isku darsatay gignaan iyo godnaan, oo kor looga bidhi karin gorofka. Markuu iska waayey hannaankii iyo shubaashii uu isku yiqiin, ayuu iska xogwramuu yidhi ; aniga oo markaygii horeba aad u gaabnaa, ayaan hoos u sii galay meel sii godan, oo waliba gigan, gorofkana kor uma gani karo.

Ujeedaduna, waa afeef dhigasho iyo in la garwaaqsado dhibaata shubaasha ee kaga timid godnaashaha iyo gignaanta ceelka. Taas oo keeni karta in silic iyo gesenges ay ku cabbaan lo' iyo geel kolba kuwa darka jooga ee ujeedadu u dhacayso.

J'ETAIS DEJA PETIT
ET INCOMPLET
MA PLACE EST ETROITE
ET LOIN DE LA SURFACE
JE NE PEUX PLUS LANCER

Le chanteur est mal placé au puits et voudrait bien être relayé.

CANTUUGA COLLOW
 CAAGIMAYSIDE
 CANKA HOOSIYO
 CALOOSHA U TUDHO

Tiriyaha tixdu markuu arkay sac kamiin qaba, oo cosob iyo caws mid kasta ha noqotee laba canlaynaaya ayuu ka yaabay. Waxayna la noqotay in laba canlayntaasi ay la iman dhibaato wax yeesha canka iyo caloosha neefkaa taqalufka ah, een baryo ku joogeyn qaddariixa deg-dega ah.

Tixduna waa tu sideedaba, waano ah, oo ka soo horjeedda deg-degsiimaha marka wax la cunaayo dadka iyo xoolaha qaar caadeys-taan, waxayna faraysaa in si fiican la iskaga calaliyo si dhibaato u gaadhin caloosha.

PUISQUE AVEC TES GRANDES BOUCHEES
 TU NE SERAS PAS RASSASIEE
 N'ABIME PAS TA PANSE
 ET TES MACHOIRES

L'herbe est abondante et les vaches toujours trop gourmandes ne s'arrêtent pas de brouter.

WAAN OGAAYOO
 OOGADII BAY
 ILWAREEN IYO
 OOHIN KALA TIMID

Oogadu waa dhulka sare ee dhaxanta iyo dabaysha badan. Lo'duna uma adkaysato midkoodna oo indhaha ayey ka ridaan. Wuxuu tiriyaha tixdani sheegayaa, inuu iska garanaayey inay indha hadoodka kala timid oogaday ku maqnayd.

JE LE SAVAIS
 TU RAMENES D'OGO
 LE MAL DES YEUX
 ET LES LARMES

OOGO est une région de hauts plateaux où soufflent des vents forts et froids, très mal supportés par les vaches.

KAALINTA CILLAAN
 EE RAG KA CABSADAY
 ADAA IGU CESHOO
 ADAA IGU CILLALAY

Ceelka cillaan ee dhawrka nin shubto, waa ku rag ka wada cabsaday. Dani waa seetee anna danta guud iyo baahidaa, sac yahaw ma igayisii-say inaan Cilaan gunta u galo, oo aan ku ligmo gidaar aan laga tabin karin gorof iyo wax in la gano ku haboon.

TU M'AS OBLIGE
 A RETOURNER
 A CETTE PLACE ETROITE
 CRAINTE PAR LES HOMMES

Pour faire boire ses animaux le chanteur est obligé d'aller se placer à un endroit étroit et dangereux à l'intérieur du puits.

AWDAL IIB LEH
 AWRKU KARIN LEH
 OO IRMAANIDE
 SIDEEN U ARADAY

Saylac baa la odhan jiray AWDAL. Tiriyaha tixdu wuxuu neefka u ku halqabsaday u sheegaayey in Awdal ahayd meel laga ganacsan karo oo wixii la geeyaaba iib leeyahay. Intaa wuxuu ku daray in awr rarka ogol iyo xoolo irmaanba u leeyahay. Wuxuu se la yaabay sobobta ugu wacan arradka.

Tixdu waxay inna tusaysaa in xoolaha irmaan had iyo jeer laga dheefin wax buuran oo sida la rabo loogu tarkifalo, ama baahida markaa taagan lagaga boxo. Sidaana waxa la mutaa marka xoolaha intooda irmaani ay gabno yihiin. Waxa dhici karta in isna arintaas oo kale ay la soo daristay. Wuxuuna hibanayaa islahaasho la'aanta hawsha ku dhacaysa, iyo anfac darada ka haysata xoolihiisa.

LA VENTE EST BONNE A AWDAL
 LE CHAMEAU EST HABITUE A LA MARCHE
 ET TU AS DU LAIT
 POURQUOI MANQUE-JE D'HABIT ?

- AWDAL est un ancien nom de la ville de ZEILA.
 - Le chanteur se plaint de ses animaux qui ne produisent pas suffisamment de lait, alors que toutes les conditions sont réunies pour en tirer un bon prix et s'acheter des vêtements.

AMBA TAAGTAY
 KOLLA TAMARTAY
 WAXAAN TARI KARO
 KUULA TAAGNIYE
 HA IGU TURANNOO
 HA IGU SII TUMAN

Togba taagtiis rogmay, anna intaan ciidmi karo ee awooday tahay ayaan qaban, hawlahaaga iyo kolba sidii kugu habboon heegan baan u ahay, ee ha idhibin oo ha igu tiiqtiqsan.

TOUT CE QUE JE PEUX FAIRE
 MA FORCE
 MON ADRESSE
 SONT A TON SERVICE
 N'EXAGERE PAS
 NE ME PIETINE PAS

KII HAFSADAY IYO
 KII HANTIDEED DHAQAY
 KII HAFSADAY BAA
 MAAXDA HIGILKA AH
 HORAY ISKUGU RIDA

Hafsigu waa marka caanaha lagu maalo sacabada, ama lagu dhiiijisto gorof oo la heensado. Dadka qaarra waxay ku dhiiijstaan afka. Yaa-laana waxa sidaa yeela kuwa lo'da iyo geela jira. Waana mid ka mid ah kuwaas ka iska xog waramay. Wuxuuna inoo sheegayaa in isaga dhi-baato kastaa soo food saarto oo si uunan ka lihi ugu hawshoon ugu hawshoodo oo ugu dibjiro. Sayma adag iyo suun walba wuu u maraa. Wuxuuna ugu dhacaa ceel muddo aan laga cabbin, maaxdiisuna wiyi-rawday, taas oo laga yaabo in noloshiisu halis ku gasho.

ENTRE CELUI QUI A GOUTE SON LAIT
 ET CELUI A QUI ELLE APPARTIENT
 CELUI QUI A GOUTE SON LAIT
 SE JETTE LE PREMIER
 DANS L'EAU TROUBLE DU PUIITS

Le berger qui peut boire leur lait à tout moment de la journée aime et soigne davantage les animaux que leur propriétaire.

NDT : le mot HAFSAD traduit ici par "goûter", exprime l'action de traire un animal au pâturage dans le creux de la main pour atténuer sa soif.

MARKAY SIDAN TAHAY
SALOOLANE WIIL
OO SI RAG U BAXAY
BAA KA SEDA CEEL

Markay abaari dhaharato ee aroorka iyo guulkuna ay bataan waxa xoolaha ka saara saxariirka sabatana bixin kara, wiil adkaysi badan, dadaalla u dheer yahay.

PAR CES TEMPS-CI
SEUL UN GARCON TRAVAILLEUR
BATI COMME UN HOMME
PEUT TE DONNER A BOIRE

Il s'agit d'une période de sécheresse où les puits sont rares et l'eau très basse.

DEEQ ALLAA LEH
BILLEE DIRIRKUBA
KUU DAROORYOO
KUU DARUUREE

Raxmad lagu hagar baxo eebaa leh, ee bilee kuu da' dirirku oo kaaga roonaa guggii sida wanaagsan aan u di'in.

DIEU EST GENEREUX
IL SE PEUT QUE VENUS
T'APPORTE LES NUAGES
ET LA PLUIE

Cette chanson est une prière pour demander la pluie à une période où elle est habituellement rare. Elle laisse supposer que la saison des pluies a été mauvaise cette année là.

NDT : les nomades donnent à la saison se situant de fin octobre à début novembre le nom de l'astre Vénus. Ils connaissent suffisamment la carte du ciel pour établir un calendrier des pluies régulières.

DHIIGAYGA CABBOO
 ISKA DHARAGOO
 DHEEHAN GABAYGA IYO
 DHAADASHADA DAA

Waxa la yidhaa ; "lo'du xoolo maahee waa xoog rag". Nin dhibaato badani ka soo gadhay hawshii u hayey, oo isloodin kari waayey, dantuna u diiday inuu nasto ayaa tixdan tiriyey.

Markuu gaawihii darka ku shubay, lo'diina ay wada fuushay, ayey ci tilmaamaysa waayaha san ee ay ku jirto isla daba gashay. Isna wuxuu dareemay isloodin la'aanta iyo xubnaha kala tegey iyo daalka shubaasha kala soo darsey. Cidii lo'duna waxay la noqotay tiiqtiqsi, digasho iyo dhooolatusad. Waa markaa kolkuu ku yidhi, ku meel mar xoogayga oo dheehan iga daa dhaadashada, gabaygaad tirinaysidna ha ii celin.

BOIS MON SANG
 BOIS A SATIETE
 MAIS DHEHAN ARRETE
 TES CRIS MOQUEURS ET VANITEUX

Les beuglements de satisfaction poussés par les vaches qui ont bu sont interprétés, par le berger épuisé par ses efforts pour tirer l'eau du puits, comme autant de railleries.

NDT : DHEHAN est un nom donné à la vache dont la robe comporte plusieurs couleurs.

SIDII HARA GODAN
 OO HILLAAC MARAY
 DARKII MA HILLIYEEY

Marka roob aad u weyni da'o, meeshii biyo fadhiisin lihiba wey buuxsantaa. Darkuna sidoo kale ayuu noqdaa kolka rag karti lihi ay shubayaan wuuna fatahaa. Xooluhuna si fudud ayey u kala hormaan. Waana kartida iyo hufnaanta u hawl wadeenku la yimid ta tixdu tilmaamaysaa.

L'EAU ONDULE DANS L'ABREUVOIR
 COMME DANS UN ETANG PROFOND
 SOUS UN ECLAIR D'AVERSE

Le chanteur est satisfait d'avoir tiré beaucoup d'eau du puits et rempli l'abreuvoir.

MARKAAN KU ARKAAN
ASHAHAATOON
AWLAXAAN SIDAY
AAYAR TIIRSADAY

Tixdan waxa ka muuqata in kii xilka hawshu saarayeed uga soo horeeyey lo'da ama geela ceelkii loo arooray, isaga oo aan nasan qalabkiina xambaarsan ayey iyana isa soo tugtay. Inkustuu filaayey hadana wuu ka naxoo warankuu sitay ayuu meel ku tiiriyey, hawshiin isaga oo daalkii hore qaba ayuu guda galay.

A TA VUE
J'AI PRIE
ET POSE DOUCEMENT
MA LANCE DE COTE

Le chanteur avait précédé son troupeau au puits pour remplir les abreuvoirs mais les animaux sont là plus vite que prévu. Il se prépare donc sans tarder à la pénible tâche qui l'attend.

DOOBKA HAYDALI
ADAA HIIGAYE
HABLO UMA GUDIN

Tixdu waxay sheegaysaa in doobka taag dareeye hablo la baashaalin, lana yeelan xidhiidh haasaawe. Taag darada waxa ugu wacan waa dhibaato ka soo gaadhey dadaalkuu ugu jiray daryeelka xoolaha.

Waxa kale oo laga dhadhansan karaa tixdan, in dadkii hore ay aaminsanaayeen haddii u galmooshaha dumarka la badsado in la taagda-reeyo oo hawlgab la noqdo. Dadka qaarra waxa ay aaminsan yihiin in badsiga arintaas laga qaado firfircooni iyo cuntada oo loo haliilo.

CE JEUNE HOMME MAIGRE
N'A PAS COURTISE DES FILLES
C'EST TOI QUI L'A EPUISE

RAGGAN DHOOBADA
 KUUGU DHAASHADAY
 NINNA DHEEF BUU
 KUUGU DHAQAYAA
 NINNA DHAQASHUU
 KUUGU DHABAR JABAY

Dhammaan nimanka kuu ciidmaya, ee dhoobadu oogadooda wada qarisyay lana moodo iney ku subkadeen, kuna dhaashadeen waa dartaa waxay u muteen dhibaataada iyo dan ay kugu qabaan. Ka ku sheeganayaa ha kuu taranto ayuu kuugu dhabar jabay, ka ciidanka ihina ku noolaw ayuu kuugu kacaa kufayaa. Murtidan nuxurkeedu wuxuu inoo sheegayaa sida loo adeegaha iyo u adeeguhu iskugu baahan yihiin. Taasaana la timid in lihiiluhu u baahdo ciidan, ka ciidanka ahna fartay inuu maaloo muruqiisa oo u ku noolaado.

PARMI CES HOMMES
 MAQUILLES DE BOUE
 CERTAINS S'ATTACHENT A TOI
 POUR SE NOURRIR
 D'AUTRES SE FATIGUENT
 POUR TA PROSPERITE

Les motivations des hommes qui, pour donner à boire à leurs animaux, n'hésitent pas à se tremper dans l'eau boueuse sont diverses. Le simple berger ne travaille que pour sa survie alors que le propriétaire place son orgueil dans la possession d'un troupeau abondant et soigné.

SUFTI MA IHIYE
 SAAR MA TUMANINE
 SIGLAHAAGAAN
 SAAKA DHAMAY BAA
 CADKA SARARTIYO
 SEEDA IGA GALAY
 OON LA SARA KACAY

Suftigu waa nin jidbo ciyaareed gashay, haasaawe dumarna ugu dhaawanaya. Waxaana dhacda inuu habeenkii intiisa badan u ku dhaafo ciyaar, waagu marka u baryana isaga oo burbursan xubin u qaadi karaana jirin hurdada ka soo kaco. Ka saarka tuntaana dhaqdhaqaaqa badan ee u sameeyo ayuu ku daalaa. Labadaba muruqyada ayaa jilca, weyna adag tahay si ay ku fuliyaan wixii adeega ee looga baahdo. Tiriyaha tixdani midna iskuma sheegin, wuxuu se dhamay dambar neef ugub, oo lo'ah ama geela. Sida caadadu tahayna marka la badsado dambarka neefka ugub ee labada midkood ah waa lagu sirinsirqoobaa. Waana isaga ka xubnaha ka galay ee u la soo kiciwaayey.

JE NE SUIS PAS UN FANATIQUE
 JE N'AI PAS CHASSE LES ESPRITS
 C'EST TON PREMIER LAIT
 BU CE MATIN
 EN ME LEVANT
 QUI M'A RAMOLLI
 LES MUSCLES ET LES TENDONS

Les fanatiques exécutent des chants et des danses religieux pendant une grande partie de la nuit.

Il existe aussi, selon des croyances anciennes des danses rituelles servant à satisfaire des êtres invisibles vivant parmi les hommes et dont la colère peut entraîner des maladies.

Le chanteur ne s'est pas livré à ces chants et danses, mais il s'est enivré avec le lait d'une vache qui vient de mettre bas.

66 DAWLIS

*DOOG IYO ABAAR
DAYR IYO XAGAA
KAAMA DAALOO
HAAWSHA KAMA DEGO
DAWLIS BAAN AHAY
CEEL DUSHII IYO
DARKA KUU YAAL*

Wakhtiga kiisa san ee aaranka ah iyo kiisa oboska ah. Dayr iyo xagaa kolba kii la joogo ani waa ii maso oo adeeggaa kama nasto, waxaanan ahay kii had iyo jeer hawlahaaga u heegana. Darka iyo ceelka dushoodana kii had iyo goor kuu yaal sida dawliskan ahay.


Ninka heestan tiriyey xog warankiisa laba halba wuu uga jeedi kara. Waa mare, in tix tiriyuhu yahay xilkas dantii garada ah ama iney ciidan darro cabashada ka keentay.

*ABONDANCE OU SECHERESSE
AUTOMNE COMME ETE
JE TRAVAILLE POUR TOI
SANS ME FATIGUER
TEL LE SEAU TOUJOURS PRET
AU-DESSUS DU PUIITS
OU A COTE DE L'ABREUVOIR*

NDT : Le mot "doog" traduit ici par "abondance" signifie littéralement l'herbe verte.

– Pour "automne" voir note de la chanson 8.

MARSOOY MARINKII
 MAS WAX LAAYIYO
 MAROODAA DEGEY
 OO LA MARIWAA



“Marsooy” marinkii ceelka loo mari lahaa waxa degey mas wax laaya iyo maroodi kaba sii daran. Hase yeeshee dib looga noqon maayo halkii dantaadu ay ku jirto. Waana u huri naftayda, waxaana ku dadaali sidii aan u mari lahayn biyona aad u heli lahayd. Waxa u tiriyuhu maska iyo maroodiga ku sheegay, waxay u dhaw yihiin inay ahaayeen col ama budhcad qawlaysato ah.

MARSO LE CHEMIN EST OCCUPE
 PAR UN SERPENT MECHANT
 ET PAR DES ELEPHANTS
 MAIS NOUS PASSERONS QUAND MEME

- “Marso” est le nom d’une vache.
- Le berger est prêt à affronter tous les dangers qui barrent la route vers les nouveaux pâturages ou vers le puits.

68 GARASHO

SAW CAGTAYDII
CAWSKA KAMA GARAN
SAW CODKAYGII
CEELKA KAMA GARAN

Tiriyuhu wuxuu tixdan ku muujiyey sida hal iyo sac kolba kii u dhaqday u garto socodkiisa marka u maraayo meel caws leh. Waxa kale oo intaa u raaca inuu codkiisana ka sooci karo codadka kale, marka la joogo ceelka ee hugunka iyo hoobaydu yeedheyso. Dulucda murtiduna waxay inna tuseysaa sida inta dabeecaddu is badday isku qabatimaan, ee isku afgartaan.

*JE RECONNAIS TES TRACES
PARMI LES TOUFFES D'HERBES
JE RECONNAIS TA VOIX
PRES DU PUIITS*

Le berger reconnaît les traces laissées par ses bêtes même dans un terrain couvert de végétation et leurs voix parmi tant d'autres au puits.

69 HABAR


GEELA HABARTII
WAA HIR GEEDO LEH
ANNA HABARTAY
WAA HASHA IRMAAN

In kasta oo lagu halqabsaday neef geela waxay murtidu tilmaamaysaa sida la iskugu baahan yahay, oo qofna iskiis u gaadhayn halka u rabo tiyoo u helin cid toogadiisa qumisa, iyana waxay ku fushaa toos ama dadab, kolba tii ku haboon.

Waxaana lama gaasiraan ah oo la hubaa, in wax kasta oo laga rabo taran iyo dheef, xeerka u yaallaa yahay, dadaal joogto ah iyo kolba tabta ku habboon oo loogu qabbaano.

Sida u tix tiriyuhu sheegay duunyadu waxay u baahan tahay meel biyo iyo baad leh, oo wixii ka dhiman ee kalena lagu dadaalo in loo keeno. Intaa marka la helo ayaa ka alla badayna kolba neefka irmaan wuxuun ka heli, oo u ku daryeelaa naftiisa iyo inta u xil ka saaran yahay.

*LA NOURRICE DES CHAMEAUX
C'EST LA SAVANE BOISEE
ET MA NOURRICE A MOI
C'EST LA CHAMELLE LAITIERE*



70 DAGO

MEEL DAGO OOL
 OO DAB KA HURAA
 "DEEROY" WAA DABIN
 EE KAA SOO DURUG

Dabatadu markay ugaadhsi, ama xoolo ay dhacdo damacdo duurkay u baxdaa, qawyada iyo meel gabaad ah ayey duudda u gashaa. Mee-laha la degen yahayna wey ka foogaataa. Haddaba, haddii geelyahaw dab kaaga iftiimo meel degmo ool, ha u qaadan beel ee ka fogow waa gabaad qawlaysato damac dilee.

S'IL Y A DU FEU
 LOIN DE TOUT CAMPMENT
 GAZELLE C'EST UN PIEGE
 ELOIGNE-TOI

Ce sont les chasseurs qui se cachent en pleine savane et à l'écart des campements. Ils guettent ainsi le gibier, mais n'hésitent pas non plus à voler un animal perdu dans la savane.

HASHAAN CULLANKEED
 CEELKA UGU DHACAY
 HA I CAMCAMISEE
 HA IGA CELININA

Murtidu waxay sheegaysaa in tiriyuhu arkay tiiyo la dhibaayo hashii ama geeluu watay oo laga hor joogo ceelka. Isaga oo muujinaaya inuu raali ka yahay ayuu kuwii ku xadgudbaayey ku leeyahay, iyada darteed ayaan ceelka ugu dhacay, sidey rabto ha ii gashee iska dhaafa, oo faraha ka qaada. Ujeedaduna waa hawl iyo ninkeed allaa isbaday ee ha la isku dhaafo, oo in la iskaga bi'in.

*C'EST POUR CETTE CHAMELLE
 QUE JE SUIS DESCENDU DANS LE PUIIS
 LAISSEZ-LA ME BOUSCULER
 NE LA FRAPPEZ PAS*

Les chameaux qui ont soif se jettent sur l'abreuvoir et sur celui qui leur donne à boire.
 Des bergers intervenus pour les faire reculer les frappent à coups de bâton.

3. KOLKII FIDHIMADA
 FOODDA BIDIX IYO
 FARTA LAGU SIDEY
 FIDHMOW JIILAAL
 GEDDAA INUU FALI
 SOO MA FILANEYN

54. KAALINTA CIDLADA AH
 CIDHIIDHIGA JAAN
 ADAA IGU CESHOO
 ADAA IGU CILALAY

4. HABEENKAAN GUDO
 EEN GABDHO U TEGO
 EEN GAR IYO DHEXIDH
 GEES ISKAGA DHIGO
 GARAAD BADANUHU
 WEY IGA GARAN JIRAY

58. MARKAY MARORTABA
 MALEEGANE WIIL
 WUU U MALKEYN JIRAY

15. GADHOODH GOOGO'AN
 OON GALCIGU MARIN
 SAANTA GOGOSHA AH
 GEESKE FIDHINKA AH
 GIIRE MAAHEE GEEL
 KU LAMA LEH

64. NINNA DHALASHUU
 KUGU DHIIDHIYEEY
 NINNA DHUUNUU
 KUGU DHABARJABAY

48. BAKHAYL INANTII
 BAALIDA HABLOOD
 BAWDO INAN WEYN
 WAANAN BARANINE
 KAAMA BIXIYEEN

71. SACAAN CULANKII
 CEELKA UGU DHACAY
 CARUURAH JAAN
 MIYEY IGA CESHEEN

SHARXIDDA ERAYADA ADAG EE KU JIRA TIXAHA

TIRSIGA TIXAHA

2. **Boonjida carrada** = waa fudad yar yar oo ah carro, si fududna u burbura. Xooluhuna ay ku goosan karaan ilkahooda.

3. **Fidhmaw** = ba'oow, hoogoow.

6. **Hawga** = baaqa, hugunka iyo shanqadhdha (sanqadha).

7. **Dagaagilan** = doorsoon

Diihaalin = baahi iyo rafaad aan mudan.

8. **Naanida** = darka, ayaa laba jaad ah, mid waa naanida waxaana laga sameeyaa dhagax. Ka labaadna waxa laga sameeyaa harag, ka weelahuuna u badan yahay. Kaana waxa la yidhaa "naadh".

9. **Naallo** = wa wax wanaagsan oo lagu farxo.

10. **Taadhi** = waa sanad walba dhalka

11. **Hadh dabacsane** = hadh qaboobe

Hangal = assay

Weer = assay

Haltage qabe = hantaag qabe

Had uun dile = mar uun aarsade.

13. **Horseed** = sahan

Wey hawirantaa = wey ku luggo'daa

14. **Afar foolle** = waa ilmaha gu iyo bilo jirka ah, ee afarta fool u soo baxaan, hadalna ka yaqaan aabo.

Abaydiniyaay = koriyaay

Marka ay ka gobloosho = kolkay ay iskeed uga gudho.

15. **Galci** = waa ul yar oo madaxa loo buuray si subagu kolkuu fadhiisto loogu xurbiyo, oo loogu kiciyo.

19. **Hormo** = xayn, koox, ama se inta darka kol gali karta.

Huleedh = isdhigasho

Hooto = gabno

Habbana = habboona.

Saluug = qof ama neef wax la siiyey bida inuu ku yar yahay

Yaayuul = yuus.

21. **Tubtay** = meeshey.

23. **Maydhaq** = saddexda feedhood ee u danbaysa iyo hilibka ka lusha ayaa la yidhaa maydhaq. Waana ta lo'da ta lagu tilmaamo maydhaq. Ta adhigana waxa la yidhaa sarar.

Kibid = cidhiidhi galin.

24. **Gunnaha** = halkii ku haboonayd, oo ahayd gunta hoose.

25. **Arar** = waa marka xolaha la sii daajiyo intaan ceelka la geyn.

26. **Ramash** = jaad tigaadda ka mid ah dhakhsana u baxa oo markaaba qalala.

27. **Weedh** = hawraar. erayo taxan oo macna leh, tix, hadal.

28. **Waaris** = waa socod waayeel da' weyn.

29. **Kal** = muddo

30. **Hooto** = gabno caano yar

Hadhaa = maahays, waa neef la socon karin xoolaha kana gaa-biya.

Hirdi = waa gujo dagaal oo xoolaha u gaara.

34. **Gedef** = wax qaab wareegsan leh, marka timaha la xamro ama se la dabo ee lafta lagu dhajiyo baarkana laga feedho oo la sigib tiro. Ama se halka xamarku ku dhamaado lagu qabto xadhig yar oo laga soohay saynta fardaha, oo la yidhaa jare. Haddaba timaha inta feedhan ee aan dabnayn sida ay yihiin iyo wixii sawaabiya ayaa lagu sheegi karaa gedef.

35. **Dar** = waxa loola jeedaa "qaar" ama "in".

Ceelaan gamashiyin = ceelaan biyo yareyn

Gaawe = gorof

Gabno = caano yar

U qoondeeyey = la jeclaaday.

Ayro = caano badan

36. **Diilo** = waa magac sac

Duran = taqaluf, iimaan darro

Didimiyey = ku gororiyey.

41. **Guduudanaha wuxuu ula jeedaa tix tiriyuhu subag.**

Isla gacashadey = isla jeclaadey.

Gunno = wax si gaar ah la isku siiyo oo loo qoondeeyo cid dan gaar ah loo lee yahay.

42. **Rigo** = Adkaysan. ~ Alkumid : bilaabid. Tirihaya tixduna siduu ugu dhaqmay erayga waxa ay tahay adkayn. Samayn.

Raggu alkumay = raggu dhisay.

43. **Radin** = Waa qolka shinidu ay malabka ku samayso, ha noqoto geed jirid weyn oo dhuuxa ka daloola, ama dudumo aan sidaa u weynayn.

Raari (du) = waa nooc ka mid ah tigaada oo ay lo'du jeceshahay.

Ugu qamaamaan = sida naflay oomani ugu yaacdo meel biyo leh, wax xiiso leh, ama dhacay.

Baaq = dhawaaq ama astaan lagu wada hadlo oo wax la isku garansiyo.

45. **Sareedo** = Bashbash iyo barwaaqo.

48. **Bargarad** = Wa qof lexejeclo badan, oo wax ka baxa ogolayn.

49. **Duuf** = Bakhti.

Hawraar = hadal murti leh.

Xayndaab = wareeg darbi oo kale ah oo laga sameeyo ood, ama laga dhiso sarab iyo wixii la mid ah.

Uurkutaallo = utun iyo ciil aan la illaawin karin.

Tooggo = dan qof leeyahay oo inuu gaadho rabo.

50. **Madal** = fagaare, balan,

51. **Gantoobnaa** = kala dhantaalaa.

Kaalin = waa halka qofku hawsha kaga jiro.

Gigan = meel kor loo eego oo lagu hunguri jabo qoortuna ku daasho oo si quman loo eegi karin.

Ganid = tuurid, ma gani karo, ma tuuri karo.

52. **Caagi maysid** = ka gu'imaysid.

Kamiin = hamuum

Qaddariix = si degdesiimo iyo qalbiqaatan ku jiro wax u cunid.

53. **Ilwareen** = Waa xanuun lo'da iyo geela indhaha kaga dhaca oo dabaysha jiilaalka ee qaboobi u sobo tahay.

54. **Igu cilalay** = igu ligay

Cilaan = tix tiriyuhu wuxuu ula jeedaa ceel magaciis.

55. **Awr karina** = awr rarooyo ah ama se qabatiimay rarka.

Karin = raadka raridda badani u yeesho kuruska awrta.

57. **Maaxda higilka ah** = waa biyo ceel in mudo ah aan laga cabin.

Wiyeer = waa biyo dhadhankooda iyo midabkoodu isbadaleen.

58. **Saloolane wiil** = waa wiil hawsha qabatiimay.

Ka sada ceel = wax uga qabta oo waxa ka siiya ceel.

61. **Heliyey** = buuxdhaafay, haraaciyey, intey buuxsameen bay biyihii fataheen.

62. **Awlax** = waran weyn, wajiir.

63. **Doobka haydali** = doobka taag dareeyay.

Adaa hiigay = adaa sariigay, adaa xoogiisi dhameeyey.

65. **Sigle** = waa danbar neef ugub ah oo abeer ah, ama se garabweyn ah.

70. **Dago** = waa reer meel yaal oon lagu sheegi karin beel.

Dabato = qoolaysato

Qawyo = garbooyin.

71. **Culankii** = dartii

Dhamaan dadka ku qoran boggani waa kuwii aan ka soo ururinay heesaha iyo kuwii naga caawiyey sharax, waxayna degen yihiin Jamhuuriyadda Jabuuti. Da'dooduna wa soddan ila iyo todobaatan jir.

Les personnes dont les noms suivent m'ont aidé dans le commentaire et le recueil de ces textes. Elles résident toutes dans la République de Djibouti.

Abdi Djama Barré
Hadi Miguil
Abdillahi Omar
Goumaneh Arayé Ali
Aden Ali
Ibrahim Bahdon Jilané
Ahmed Aden
Miguil Osman
Ahmed Awaleh Kadiyé
Migané Osman
Ali Koul
Mohamed Waïss
Awalé Ibrahim
Mohamoud Gueldon
Barré Houffané
Moumin Miguil
Elmi Kahin
Osman Ibrahim
Farah Waïss
Salah Miguil
Guirré Dharar Roblé
Souleiman Youssouf
Hassan Elmi
Waberi Farah
Hassan Galeb Abtidon
Waïss Eyeh
Hassan Roblé Waïss.
Djamac Mouse
Omer God Bouh
Meydhane Adane Khayre «Goobaale»
Okiye Iltire Kamil «Hanahaaban»

OUVRAGES CONSULTÉS :

- Andrzejewski, B.W.
the art of the miniature in Somali poetry
Reprinted from, African language
Volume 6
PP 5-16. (1967).
- Andrzejewski, B.W. and Musa H. 1 (1963)
A. Somali poetic combat
Journal of African language
Volume 2
PP – 15-28, 93-100 and 190-205.
- Andrzejewski, B.W. and Innes
Reflections of african
oral literature
Reprinted from African language Review
Volume 1 – 1975.
- Andrzejewski, B.W. and Lewis I.M. (1964)
Somali poetry : and introduction
Oxford
at the Clarendon press.
- Henige David (1982)
Oral Historiography
London – New-York.
- Finnegan Ruth (1977)
Oral poetry :
its nature significance and social context
Cambridge University.
- I.M. Lewis
Pastoral democracy
London – 1961.
- I.M. Lewis
Peoples of the Horn of Africa – 1969.
- Wasaaradda waxbarashada iyo barbaarinta (1976)
Suugaanta – Fasalka Afraad.

HOOBAANTA AFKA HOOYO

LES FRUITS MURS
DE LA LANGUE MATERNELLE

EDITE
PAR L'I.S.E.R.S.T. (SERVICE SCIENCES HUMAINES)
B.P. 486 - DJIBOUTI

Par S.A. Warsama
Traduit par Aidid Aden
Illustrations
de Djama Elmi God

«HOOBAANTA AFKA HOOYO»

Date de parution : le 28 juillet 1987

Dépôt légal n° 48 - 2 000 exemplaires

IMPRIMERIE NATIONALE - DJIBOUTI